FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya

Waxa la soo saaray
23ka Bisha 8aad , 2007

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

## Warbixin Gaar ah - Falanqaynta Guga 2007 Kadib

Warbixintan kooban ee gaarka ah ee FSAU waxay koobaysaa natiijooyinka muhiimka ah ee Qiimayntii iyo Falanqayntii Guga 2007 Kadib, taasoo ka soo baxday howlo gudaha laga sameeyey (25kii bishii 6aad – 15kii bishii 7aad), aqoon-iswaydaarsi falanqaynta ah oo heer gobol iyo qaran ah (15kii bishii 7aad – 4tii bishii 8aad) iyo kulan hubinta iyo baadhitaanka farsamada ah oo lala yeeshay hay'adaha ay FSAU isbahaystaan (9kii bishii 8aad). FEWS NET Soomaaliya iyo 36 hay'adood oo kale oo ay isbahaystaan oo ay ku jiraan maamulka dawladaha ee heer gobol, hay'adaha Jimciyadda Quruumaha Ka dhaxaysa iyo kuwa caalimiga ah, ururrada aan dawliga ahayn ee gudaha iyo kuwa caalamiga ah ayaa ka qaybqaatay ama taageeray howshan qiimaynta iyo falanqaynta Guga Kadib.

FSAU iyo FEWS NET waxay wadajir u soo saareen war saxaafadeed oo ku saabsan qodobadda ugu muhiimsan natiijooyinka 14kii bishii 8aad, taasoo keentay 3 waraysi oo idaacado ay la yeesheen FSAU: BBCda (15kii bishii 8aad), Codka Ameerika (VOA) (17kii bishii 8aad ) iyo Idaacadda Codka Germany (Deutsche Welle) (17kii bishii 8aad). Kulan gaar ah oo lagu soo bandhigay natiijooyinka ayaa laga semeeyey Xoghaynta Taageerada Soomaaliya (SSS) (13kii bishii 8aad). Waxa la qorsheeyey natiijooyinka in loo soo bandhigo kulan lagu wargelinayo Deeq-bixiyeyaasha oo ay qabqaabinayso hay'adda UNOCHA IASC (28ka bisha 8aad) iyo ambaqaadka Codsiga Deegda ee Wadajirka ah ee Soomaaliya (CAP) (3da bisha 9aad). Bandhigyada heerka gobol ee Soomaaliya waxa laga sameeyey Garoowe (16kii bishii 8aad), Doolo (19kii bishii 8aad), Hargeysa (20kii bishii 8aad), Baydhaba (21ka bisha 8aad), Beled Weyne (23ka bisha 8aad) iyo Bu'aale (23ka bisha 8aad). Warsaxaafadeed, waraysiyo idaacadeed iyo bandhigyada laga sameeyey natiijooyinka iyo Khariidadda Qoondaynta Xaaladda ee qiyaasaysa tirada dadweynaha oo ah heer gobol, degmo, iyo hab-nololeed waxa dhammaantooda laga helyaa Websaytka FSAU.

Cimilada
Colaad Sokeeye
Beeraha
Xoolaha
Suuqyada
Nafaqada
Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka:
+254 20 374 5734
Faakiska:
+254 20 3740598
Iimayka:
fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

## NATIIJOOYINKA UGU MUHIIMSAN

Iyadoo ku salaysan qiimaynta xilliga Guga 2007 kadib, Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada (FAO/FSAU) iyo FEWS NET, waxay xaqiijinayaan iyo xaaladda hubinta cuntada ee gobolladda sida ugu xun ay u sameeyeen abaarta iyo daadadku oo ay ku jiraan gobollada Jubbooyinka iyo Gedo ay hore u martay. Hase yeeshee, guud ahaan tirada dadka u baahan gargaar ee Soomaaliya way korodhay taniyo bishii 3aad xaaladda bina-aadamnimada ee gobollada Shabeellooyinka oo aad uga sii dartay darteed. Tirada dadka u baahan gargaar bina-aadamnimo waxay korodhay 50% taniyo Deyrtii 2006/7 kadib, iyadoo ka kacday **1 malyuun oo qof** oo noqotay **1.5 malyuun oo qof.** 1.5 malyuun ee qof, **295,000 oo ka mid ahi waxay ku jiraan Gurmad Bina-aadamnimo** (GB) waxana ay u baahanyihiin wax-qabadyo nolosha lagu badbaadiyo iyadoo **490,000 oo qofna ay ku jiraan Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** (XCHAX) waxana ay u baahanyihiin taageero hab-nololeedka ah. Waxa intaas dheer, 325,000 qof oo cusub oo ka soo barakacay Muqdisho 400,000 oo horeba u barakacsanaa oo u baahan wax-qabadyo lagu badabaadinayo nolosha iyo kuwo lagu badbaadinayo hab-nololeedka labadaba (Khariidadda 1 iyo Sanduuqa 1).

Badi ama 85% dadka lagu tilmaamay inay ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo** 31% oo lagu tilmaamay inay ku jiran **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** waxay joogaan gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe. Tiradani waxay ka wakiil tahay 250,000 oo jooga Shabeellada Hoose iyo 150,000 oo qof oo jooga Shabeellada Dhexe, waxana ku jira dadweynaha beera-iyo-xoola-dhaqatada ah (41%), beeraha biyaha daadadka laga waraabiyo (32%), iyo dhulka webiyada (22%). Gobollada Shabeellooyinku, oo guud ahaan ah gobollada ugu adkaysiga badan iyo 'kuwa cuntada ugu badan soo saara' koonfurta Soomaaliya, waxay la ciireen saamaynta waxyaabo naxdin leh oo ay ku jiraan soosaarki midhaha/firrida ee ugu hooseeyey muddo toban sano ah (44% Celceliska Dagaalkii Kadib "CDK") roobabkii xilliga Guga oo caadi ka hooseeyey dartood iyo qalabka waraabinta oo ay waxyeello gaadhay, heerarka sicir-bararka oo aad u sarreeya, gaar ahaan cuntada iyo badeecadda kale (wuxuu kordhay 40% illaa 60% saddexdii bilood ee u dambeeyey), howlaha ganacsiga iyo dhaqaalaha oo qasmay, tiro sare isla markaana sii kordhaysa oo ah dadka ka qaxaya Muqdisho oo gobolladaas isugu uruuray iyo duruufaha caafimaadka oo sii xumaanaya kadib markii uu dillaacay cudkra Shuban Biyoodka, iyo dagaalka sokeeye ee socda siina kordhaya.

Gobollada Shebeellooyinka waxa kale oo marti u ah 83,000 oo dad cusub oo barkacay ah, waxana lagu qiyaasay illaa 30% dadka weli ku jira Muqdishu ay soo food saartay inay ka sii darayso hubinta cuntada, hab-nololeedka iyo nafaqadu. Baadhitaanno nafaqada ah oo dhowaan la sameeyey waxay xaqiijinayaan in Heerar Nafaqa-darrada guud ah oo aad u xun (GAM) oo ka jiray gobollada Shabeelle ay iminka ka sarreeyaan heerarka gurmadka (> 15%), iyadoo ay jiraan heerar sare oo nafaqa-darro Aad u Xun (SAM)(> 4.0%). Goobo ah gudaha iyo kuwo ku hareeraysan Muqdishu waxay ku wadaan inay soo food saareen arrimaha ay ka midka yihiin xiisad qabaa'ilka ka dhex taagan, jid-goyn, colaad ku salaysan khayraadka dabiiciga ah (oo ay ku jirto colaad lahaanshaha dhulka ku saabsan), iyo rabshado sii kordhaya (oo ay ku jiraan dil la qorsheeyey, qaraxyo wadooyinka agtooda ka dhaca iyo xad-gudubyo lagu samaynayo xuquuqda bina-aadamka). Dhammaan waxyaabahaas naxdinta leh oo muddo gaaban gudaheed ku dhacay waxay keeneen in si degdeg ah ay gobolladaasi u galeen **Gurmad Bina-aadamnimo** oo saameeyey in ka badan 600,000 oo qof oo jooga Shabeellada Hoose iyo Dhexe iyo Muqdisho.

Gobolka Hiiraan xaaladda hubinta cuntada iyo hab-nololeedka iyo dhulka webiyada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatadu waxay ku wadda inay ka sii darayso. Waxa jira 15,000 oo qof oo lagu tilmaamay inay ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo** iyo 30,000 oo ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun**, tiradaas 46% waxa weeye qoysas jooga dhulka webiyada, 54%na waa qoysas beera-iyo-xoola-dhaqato ah. Hiiraan waxa kale oo marti u ah 13% oo ah dadka cusub ee ka soo barakacay Muqdisho (42,000). Nabad-la'aanta iyo xiisadda ka sii socota waxay adkaynaysaa fursad-u-helidda iyo dhaqdhaqaaqa gobolladaasi. Dhowaan colaadaha ku salaysan khayraadka dabiica ah ee ka dhacay goobaha xoola-dhaqatada ee soohdinta la leh gobolka Galgaduudna waxay keenayaan in dadweynuhu ay galaan halis tii hore ka weyn oo ah in xaaladdu ay ka sii darto.

Gobollada dhexe waxay ku wadaan inay taageerayaan tirada ugu badan ee dadka cusub ee ka soo qaxay Muqdisho, gaar ahaan gobollada Galgaduud (oo ay u qaxeen 110,000 oo qof), iyo Mudug (oo ay u qaxeen 41,000 oo qof). Natiijooyinka Baadhitaanka Saamaynta Dadka Barakacay ee Guga 2007 kadib ee gobolladaasi waxay muujinaysaa xaalado ah **Gurmad Bina-aadamnimo iyo Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** marka tirada badan ee dadka barkacay ee isugu uruuray gobolladaas la barbar dhigo bulshada ay martida u yihiin, uma haystaan fursad-u-helid ku filan biyo nadiif ah iyo adeegyada daryeelka cafiimaadka. Waxana jira dhibaatooyin la xidhiidha fursad-u-helidda cuntada waayo waxa lumay ama la waayay hab-nololeedyadaa, taasoo uu welihliyo sicir-bararka aadka u sarreeya ee cuntada lagama maarmaanka ah iyo tan aan lagama maarmaanka ahayn iyo taageerada bulshada oo kooban. Shan bilood kadib markii tirada u horraysay ee dadku ay soo barakaceen, weli way yaryihiin arrimaha ku dhiirrigelin kara inay ku laabtaan Muqdisho. Iyadoo bulshooyinka ay martida u yihiin ee gobolladaasi ay weli ku jiraan xaalad ah **Hubin La'aan Cuntada ah oo Joogto ah**, digniinta hore (ee xaalad sii xumaanaysaa) waxa laga beddelay **Feejignaan** waxanana laga dhigay **Halis dhexdhexaad ah**. Colaadda ku salaysan khayraadka dabiiciga ah iyo xiisadaha ka dhex taagan qabaa'ilka ee Galgaduud way sii kordhayaan waxana ay ku wadaan inay si xun u taabanayaan dadweynaha, koobayaan guuritaanka xoolaha, horseedayaan dhaqdhaqaaqa dadweynaha iyo inay qasayaan socodka ganacsiga.

Gobolka Gedo, xoogaha horumar ah ayaa dhacay taniyo Deyrtii 2006/7, hase yeeshee, weli waxa jira 30,000 oo qof oo lagu qiyaasay inay ku jiraan Gurmad Bina-aadamnimo, iyo 80,000 oo kale oo ku jira Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (Deyrtii 2006/7 110,000 oo qof ayaa ku jiray GB 90,000 oo qofna waxay ku jireen XCHAX). Gobollada Jubbada Hoose iyo Dhexe, waxa jiray horumar weyn oo dhammaan kooxaha hab-nololeedka ah sababtoo ah tirada xoolaha oo si weyn dib ugu soo kabatay gaar ahaan adhiga iyo geela, helitaanka caanaha iyo hilibka oo wanaagsanaaday, qiimaha xoolaha oo kor u kacay, soosaarka dalagga oo fiicnaaday, iswaydaarsiga ganacsiga oo sarreeya isla markaana fiicnaaday, iyo helitaanka shaqada iyo fursadaha dakhli helidda oo kordhay goobaha dhulka webiyada, oo ay ku jiraan kalluumaysiga dhasheegyada. Xaaladda guud ee nafaqada ee gobollada Jubbada Dhexe iyo Hoose ee taniyo Deyrtii 2006/7 waxay iyana muujinaysaa horumar ah heerarka nafaqa-darrada oo ka soo degay Halis Weyn noqdayna Halis goobaha hab-nololeedka dhulka webiyada, iyadoo hab-nololeedyada xoola-dhaqatada iyo beera-iyo-xoola-dhaqatada, xaaladdu ay fiicnaatay oo ay ka soo degtay halis noqotayna mid Adag. Taasi waxay keentay, in dadkii hore ugu jiray Gurmad Bina-aadamnimo ay iminka ku jiraan Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun, iyo in qaar ka mid ah kuwii hore ugu jiray Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun ay iminka ku jiraan Hubin la'aan Cuntada ah oo Joogto ah. Tirada dadka ku jira Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun laga billaabo bisha 7aad illaa bisha 12aad ee 2007 gobollada Jubbada Hoose iyo Dhexe waxa lagu qiyaasay 145,000 oo qof (marka loo eego Deyrtii 2006/7 oo ay ahayd tirada ku jirta XCHAX 170,000 oo qof tirada ku jirta GBna waxay ahayd 110,000). Inkasta oo horumarkaasi uu dhacay, haddana weli waxa jirta in baahi weyn loo qabo gobolladaasi in laga sameeyo wax-qabadyo qaybaha ah oo xeeladeed oo lagu taageerayo dib u soo kabashada hab-nololeedyada, waxna lagaga qabanayo dhibaatooyinka waaweyn ee aasaasiga ah ee fursad-u-helidda biyo nadiif ah, daryeel caafimaad iyo hab-dhaqannada daryeelka carruurta ee liita. Haddii aan la samayn jawaab-celin xeelad ku dhisan wakhtiga habboon, bulshooyinkaasi waxay ku wadi doonaan inay u nugladaan xiisad bina-aadamnimo sannadka soo socda.

Saamaynta Wax-qabadka:

Baahi Degdeg ah oo loo qabo in Jawaabcilin Wadajir ah oo Feejigan laga Sameeyo Gobollada Shabeellooyinka

Marka la eego baaxadda xiisadda bina-aadamnimo ee ka jirta Muqdisho iyo gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe iyo xiisadda saamaynta kala duwan leh ee haysata dadweynaha dhulka miyiga ah iyo dadka cusub ee barakacay, waxa jirta baahi degdeg ah oo loo qabo gargaar bina-aadamnimo oo wadjir ah oo istaageera oo fiirada saara baahida degdegga ah ee ay ku jirto cunto, biyo nadiif ah, adeegyada caafimaadka iyo faya-dhowr, oo ay la jiraan howlo lagu taageerayo hab-nololeedka iyo kuwo lagu ilaalinayo hantida hab-nololeedka si loo hubiyo dib u soo kabashada aayaha dambe (tusaale ahaan barnaamijyo shaqo oo dib loogu habaynayo qalabka waraabinta intaanay di'in roobabka xilliga ee dambe iyo in hore loo mariyo fursad-u-helidda biyo nadiif ah oo badbaado u leh leh inay cabbaan bina-aadamku). Isla markaas waxa baahi loo qabaa in la kordhiyo u doodidda dhammaan heerarka kala duwan ee ku saabsan in la joojiyo colaadda, dagaalka sokeeyo iyo xasillooni la'aanta siyaasadeed – tani waxay muhiim u tahay in loo ogolaado in fursad-u-helid tan ka weyn loo helo bina-aadamnimada, in la dhiirrigeliyo dib-u-billaabidda howlaha dhaqaalaha, iyo in laga hortago in la sii galo xiisad bina-aadamnimo oo tan baaxadeeda iyo heerkeedu uu ka sii weyn yahay.

Guud ahaan dadweynaha ku jira:

Gurmad Bina-aadamnimo (GB): Waa in loo sameeyo wax-qabadyo istaageera oo dagdeg ah oo fiirada saara baahida degdegga ah, oo ay ku jirto in fursad-u-helid dheeraad ah loo helo cunto iyo in la taageero qaybaha kale hadba sida loogu baahanyahay (tusaale ahaan biyo, caafimaad iyo faya-dhowr). Ilaalin degdeg ah in la sameeyo si aanay si buuxda hantida hab-nololeedku ugu lumin si loo hubiyo dib u soo kabasho aayaha dambe.

Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX): Waa in degdeg loo sameeyo wax-qabadyo lagu taageerayo hab-nololeedyada si loo joojiyo lumidda hantida hab-nololeedka ama wax looga taro dib u soo kabashadooda, tusaale ahaan wax-qabadyo qaybaha ah oo xeelad ku dhisan sida dayactirka ceelasha, biyo-galeennada iyo qalabka waraabinta, horumarinta fursad-u-helidda adeegyada caafimaadka, biyo nadiif ah, iyo kordhinta fursad-u-helidda amaah ama deyn bixinta.

Goobaha ku jira Hubin la'aan Cuntada ah oo Joogto ah: Inkasta oo aan degdeg loogu baahanyn taageero bina-aadamnimo iyo mid hab-nololeedka ah, haddana goobahaasi waxay degdeg ugu baahanyihiin wax-qabadyo xeelad ku dhisan oo hore loogu mariyo adkaysigooda si loo dhimo halista iyo u nuglaanta waxyaabaha naxdinta leh aayaha dambe. In wax laga qabto waxyaabaha aasaasiga ah ee caqabadda ku aha hirgelinta hubinta cunto, nafaqo iyo hab-nololeed ku filan, iyo in wax laga qabto sababaha aasaasiga ah ee keenaya heerar aad u sarreeya oo nafaqa-darro ah sida horumarinta kala duwanaata cuntada, fursad-u-helidda daryeel caafimaad, biyo nadiif ah iyo horumarinta qaababka daryeelka carruurta.


**Sanduuqa 1: Qiyaasa Dadweynaha Dhulka Miyiga ah ee ku jira Gurmad Bina-aadamnimo (GB) & Xiisad Cuntada & Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) oo Heer Gobol ah oo ay ku jiraan Kooxaha ku jira Halis Sare**

| Gobollada Saamoobay | Wadarta Dadweynaha ee UNDP 2005[1] | Tirada Dadwynaha La Qiimeeyey iyo Kuwa Qorshaynta ee ku Jira XCHAX iyo GB | | |
|---|---|---|---|---|
| | | Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)[2] | Gurmad Bina-aadamnimo (GB)[2] | Wadarta dadka ku jira XCHAX ama GB oo ah % Dadweynaha Gobolka |
| **Waqooyi [3]** | **2,341,718** | 0 | 0 | 0 |
| **Dhexe** | **680,156** | 0 | 0 | 0 |
| **Koonfur** | | | | 0 |
| Bakool | 310,627 | 80,000 | 0 | 26 |
| Baay | 620,562 | 5,000 | 0 | 1 |
| Gedo | 328,378 | 80,000 | 30,000 | 33 |
| Hiiraan | 329,811 | 30,000 | 15,000 | 14 |
| Jubbada Dhexe | 238,877 | 65,000 | 0 | 27 |
| Jubbada Hoose | 385,790 | 80,000 | 0 | 21 |
| Shabeellaha Dhexe | 514,901 | 60,000 | 85,000 | 28 |
| Shabellaha Hoose | 850,651 | 90,000 | 165,000 | 30 |
| **Isku darka (Koonfur)** | **3,579,597** | **490,000** | **295,000** | 22 |
| **Banaadir** | **901,183** | . | . | . |
| **WADARTA GUUD** | **7,502,654** | **490,000** | **295,000** | 10 |

| | | |
|---|---|---|
| Dadweynaha Dhulka Miyiga ah ee La Qiimeeyey ee ku Jira XCHAX ama GB | **785,000** | **10[5]** |
| Qiyaasta tirada dadka cusub ee barkacay taniyo bishii 4aad ee 2007 | **325,000** | **4[5]** |
| Qiyaasta tirada dadka hore u barkacsanaa | **400,000[4]** | **5[5]** |
| Qiyaasta wadarta dadweynaha ku jira xiisad | **1,510,000** | **20[5]** |

Eeg sanduuqa Dadweynaha ee ku jira Websaytka FSAU si aad u helso xusidda iyo tixraacyada.


**Khariidadda 1: Qoondaynta Xaaladda Hubinta Cuntada iyo Bina-aadamnimada ee Soomaaliya: Saadaasha Guga 2007 Kadib, Bisha 7aad illaa bisha 12aad ee 2007**





khariidadda qoondaynta xaaladaha ee Guga '07 Kadib

## ARRIMAHA UGU MUHIINSAN QAYBAHA

**Khariidadda 2: Isku-darka roobaabka Guga '07 (mm), 20kii Bishii 3aad – 30kii Bishii 6aad, '07**




**Khariidadda 3: Roobabka Guga '07 oo ah % Celceliska Muddada Dheer, 20kii Bishii 3aad – 30kii Bishii 6aad,'07**




Waxa laga soo qaatay: USGS/FEWSNET

cimilada

### CIMILADA

XiLli roobaadka ugu muhiimsan ee Guga 2007 wuxuu ka billaabmay qaybo badan oo dalka ah, 20kii bishii 4aad taasoo tilmaamaysa inuu wakhtigiisii ku billaabmay. Hase yeeshee, wakhtigan caadiga ku dhow ee ay roobabka Gugu billaabmeen ee badhtamihii bishii 4aad, waxa wiiqay in roobabku ay liiteen si simmanna aanay u di'in bishii 5aad iyo 6aad qaybo badan oo ah gobollada koonfurta iyo dhexe. Roobabku siday u da'een xilligan marka loo eego xoogga iyo gaadhitaanka dhulka kala duwan way liiteen, iyadoo qaybo ka mid ah gobollo badani ay heleen roobab caadi ka hooseeya laga billaabo 20kii bishii 3aad illaa 30kii bishii 6aad, 2007 (Khariidadda 2 iyo 3). Gaar ahaan, roobabka Gugu way liiteen goobaha midhaha/firrida laga beero ee gobollada Shabeellooyinka, Hiiraan, Gedo, Bakool, Baay iyo Jubbooyinka. Marka laga reebo goobo ka mid ah degmooyinka Sablaale iyo Qoryoolay ee gobolka Shabeellada Hoose, roobabka Guga ee ka da'ay badi gobollada Shabeellooyinku way liiteen.

Gobollada Baay iyo Bakool, roobabka xilliga Gugu waxay ku billaabmeen wakhtigoodii, laakiin roobabku si siman uga may di'in ama umay gaadhin goobahaas. Xogta aaladda qiyaasta roobka ee qaar ka mid ah degmooyinka dhulka hadhuudhka ugu badan laga beero ee gobolka Baay waxay tilmamaysaa in maalmo yar roobabku ay da'een taasoo xaqiijinaysa in sinnaanta di'itaanka roobabka Gugu ay liidatay taasoo keenaysa in muddo dheer uu qalallaado badi gobolkaas. Warka ku saabsan isbarbar dhigidda ama hubinta warku wuxuu xaqiinjinayaa in goobaha xeebaha ee gobollada Jubbooyinku, ay heleen roobab Guga ah oo caadi ah, hase yeeshee qaybaha waqooyiga ee Jubbada hoose, oo muhiim u ah beeritaanku midhaha/firridu gaar ahaan degmada Saakow ee Jubbada Dhexe iyo dhammaan gobolka Gedo roobabka ka da'ay way liiteen. Marka la isbarbar dhigo qiyaasta hadda iyo ta celceliska muddada dheer waxa muuqata in roobabka da'ay 20kii bishii 3aad illaa 30kii bishii 6aad ay ka hooseeyeen caadi badi qaybaha dalka (Khariidadda 1 iyo 2).

Gobollada ku tiirsan xoolaha ee waqooyi-bari, roobabku waxay billaabmeen mar dambe (badhtamihii bishii 5aad) guud ahaanna waxay ku da'een wakhtigoodi waqooyi-galbeed, iyadoo muddaday roobabku da'ayeen iyo goobahay ka da'eenna ay ahaayeen caadi ama ku dhowaayeen. Gobollada Galbeed, Awdal iyo Hawdka Togdheer waxay heleen roobab ay qiyaastoodu tahay 125-250 mm, taasoo ka badan boqolkiiba 120 celceliska muddada dheer. Hase yeeshee, sida ay u da'een roobabka Gugu qaybo ka mid ah bariga Sanaag, goobo ka mid ah Sool iyo Nugaal iyo weliba xeebaha Bari way liiteen (Khariidadda 2 iyo 3). Sidoo kale, gobollada Mudug iyo Galgaduud roobabku way ka hooseeyeen caadi horebana biyo galeennada iyo barkaduhu way u qalaleen.

Goobo kale oo muhiim u ah xoola-dhaqatada, daaqa iyo biyaha waa laga helaa badi gobollada, taasoo ka timi saamaynta arerimaha isku biiray ee roobabkii Guga 2006 ee caadiga ah ee ay ka dambeeyeen roobabkii Deyrtii 2006/7 ee aadka u fiicnaa, xilligii Jiilaalka 2007 ee sahlanaa iyo roobabkii Guga 2007 ee wakhtigoodu ku da'ay badhtamihii bishii 4aad (eeg qaybta Xoolaha). Taasi waxay keentay, in Cabirka Cagaarka dhulka uu muujinyo in xaaladaha cowska iyo daaqa ee badi goobaha muhiimka u ah xoola-dhaqatadu ay ka sarreeyaan caadi iyo in la filayo inay caadi ahaan doonaan bilaha soo socda.

COLAADDA SOKEEYE


Inkastoo halista ka imanaysa colaad hubaysan oo fidda oo la soo cusboonaysiiyaa ay hoosaysay, haddana colaadda goobaha qaar ku koobani way sii korodhay waxana ay ku waddaa inay ka sii darayso xaaladda nabad sugidda ee qaybo badan oo dalka ah, gaar ahaan gobollada Shabeellooyinka, Hiiraan iyo Dhexe. Dhammaan tilmaamuhu waxay muujinayaan in xiisadaha siyaasadda iyo qabaa'ilka, colaadda sokeeye, colaadda ku salaysan khayraadka dabiiciga ah iyo qaska ku yimi howlaha dhaqaaluhu ay ku wadi doonaan inay kordhaan toddobaadyada soo socda.

Waxa walaac gaar ah laga qaba xasillooni la'aanta iyo nabad la'aanta ku sii kordhaysa Muqdisho iyo goobaha ku hareeraysan, taasoo ay la xidhiidhaan iska hor imaadyo, dil, jid-goyn, dhac, iyo xiisadda ka dhaxaysa Dawladda Federaaliga ah ee Ku Meel Gaadhka ah (TFG) iyo malayshiya qabiil ku salaysan. Colaadda sokeeye ee ka jirta Muqdisho waa qodob weyn oo keenay inay degdeg u galeen Gurmad Bina-aadamnimo gobollada Shabeellooyinku maddama ay colaaddu qastay howlaha dhaqaalaha keentayna lumidda shaqooyinka, fursadaha dakhliga, hab-nololeedyada iyo fursada adkaysiga ee kumannaan qof, oo uu isla markaana soo food saaray sicir-barar aad u sarreeya oo keenay inuu kordho qiimaha cuntada iyo badeecadda aan cuntada ahayni.

Qaska sii socda ee howlaha dekedda iyo suuqa Bakaaraha ee Muqdisho waxay si xun u sii saamaynayaan dhaqaalaha guud ee badi gobollada koonfurta iyo dhexe ee Soomaaliya, maddaama ay koobayso socodka ganacsiga iyo howlaha suuqyada. Jid-goynta iyo cashuuridda aan sharciga ahayni waxay kharash dheeraad ah ku sii kordhinayaan qiimaha cuntada lagama maarmaanka ah iyo ta aan ahayn. Horeba waxa jira warbixino sheegaya in gudbinta badeecadda laga keeno dibedda laga wareejiyey Muqdisho oo loo wareejiyey Boosaaso (Khariidadda 4).

Colaadda Muqdishu waxay keentay inay barakaceen dad ka badan 400,000 oo qof taniyo bishii 2aad ee 2007 (Kooxda Ilaalinta ee Jimciyadda Quruumaha Ka Dhaxaysa, bishii 7aad ee 2007), taasoo keentay abuuritaanka dhowr xero oo cusub oo loogu talagalay dadka barakacay oo laga sameeyey dibedda magaalada Muqdisho iyo goobo kale oo ka tirsan gobollada Shabeellooyinka, Dhexe, Hiiraan, iyo Baay (eeg qaybta dadka barakacay). Hubin la'aanta xaaladda nabad sugiddu waxay keenaysaa in dad badani galayaan ama ka qaxayaan Muqdisho, maddaama ay dadka Muqdisho deggani isku dayayaan inay ilaashadaan hantidoodii ay ka soo tageen, iyo inay hubiyaan in xubnaha qoysaskoodu ay joogaan cimilo badbaado leh, xitaa haddii aanay haysan adeegyada lagama maarmaanka ah ee sida biyo nadiif ah, adeegyada caafimaadka iyo hoy hagaagsan. Heerkan sare ee dadweynuhu ay u qaxayaan iyo barakucu waxay keeneen dhibaatooyin dheeraad ah oo la xidhiidha dhul deganaanshaha, saxada ama faya-dhowrka oo liita, qaababka adkaysiga oo culays dheeraad ah la saaray, iyo tartan loogu jiro saadka taasoo taabanaysa dadka cusub ee soo barkacay, bulshada ay martida u yihiin iyo bulshooyinka dhulka miyiga ah ee ay xiisaddu ka taagantahay.

**Khariidadda 4: Natiijooyinka Dagaalka Sokeeye ee Soomaaliya Bishii 5aad – Bisha 7aad Dec, 2007**




Waxa laga soo qaatay: Qiimaynta Guga '07 Kadib ee FSAU



*Dadka barakacay ee jooga Jowhar, Shabeellada Dhexe, 2007*

Saamaynta tooska ah iyo ta aan tooska ahayn ee nabad la'aantaa korodhay ee goobaha qaar ku koobani waxay ku wadi doontaa in six un ay u taabato hubinta cuntada, hab-nololeedka iyo nafaqada ee dadweynaha dhulka miyiga ah iyo dadweynaha magaalooyinka ee qaybo badan oo ka tirsan gobollada koonfurta iyo dhexe waxana weeye in si dhow loo kormeero. Muqdisho iyo gobollada shabeellada Hoose iyo dhexe waxa lagu tilmaamay inay soo food saartay halista ugu weyn ee xaalad sii xumaanaysa oo horeba loogu tilmaamay inay tahay Gurmad Bina-aadamnimo. Qaybo ka mid ah gobollada dhexe iyo dhulka u dhexeeya xeebta iyo waddada ugu weyn ee isku xidha shabeellada Hoose iyo magaalada Kismaayo iyana waxa laga qabaa walaac sii kordhaya aad ayaana loo kormeeri doonaa.

colaadda sokeeye

IN KA BADAN 300,000 OO AH DADKA BARAKACAY AYAA XIISAD KU JIRA

Coladda sokeeye ee ka jirtay Muqdisho taniyo billowgii sannadkan 2007 waxay keentay in boqollaal kun oo qof oo degganaa Muqdisho ay ka barakaceen iyo in dad kale ay Muqdisho gudaheeda ku barakacsan yihiin. Sida ay sheegayso tirada Kooxda Ilaalinta ee Jimciyadda Quruumaha ka Dhaxaysaa, markii u horraysay ee ay dadka cusubi ka qaxeen Muqdisho waxay tiradu gaadhay in ka badan 400,000 oo qof dadkaas oo u qaxay gobollada Shabeellooyinka, Baay, Hiiraan, Mudug iyo Galgaduud bishii 2aad illaa bishii 5aad ee 2007.

Intii u dhaxaysay bishii 5aad iyo bishii 6aad, horumar yar oo ku meel gaadh ah oo xaaladda nabad sugidda Muqdisho la xidhiidha ayaa soo jiitay 115,000 oo qof oo ku laabtay Muqdisho. Hase yeeshee, xaaladda oo sii xumaatay waxay keentay in mar saddexaad ay dadku barakacaan, iyadoo la soo sheegay in 30,000 – 40,000 oo qof ay ka baxeen magaalada bishii 7aad illaa bishii 8aad ee 2007. Hadda, waxa lagu qiyaasay in illaa 325,000 oo qof oo ka qaxay Muqdisho ay ku barakacsanyihiin gobollada ku hareeraysan.

Hilitaanka tirada saxa ah ee dadka barakacay aad ayay u adagtay maddaama xaaladu ay isbeddelayso maalin kasta, hase yeeshee, waxa lagu qiyaasay in badi ama 86% dadkii ku laabtay Muqdisho bishii 5aad iyo 6aad ee 2007 ay dib ugu soo laabteen gobollada shabeellada Hoose iyo Dhexe, kuwaasoo ah kuwa ugu dhow isla markaana uu kharashka gaadiidku ugu yaryahay. Sida ay sheegayaan qiyaasaha u dambeeyey tirada ugu badan ee dadka cusub ee barakacay waxay u qaxeen Galgaduud halkaas oo ay joogaan 110,000 oo qof oo barakacay, taasoo ka dhigan 34% wadarta dadka cusub ee barakacay. 25% dadka barakacay waxay joogaan gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe, 13% waxay joogaan Hiiraan, 12% na waxay joogaan Mudug.



*Qoysa barakacay oo dhir iskood u baxa cunaya cunto la'aan darteed Xerada Kala Gooye, Jowhar Shabeellada Dhexe.*



*Dadka Barakacay ee jooga Galgaduud, Bishii 6aad ee 2007.*

FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan waxay sameeyeen qiimayn ku saabsan saamaynta dadka barakacay taasoo qayb ka ah howlaha qiimaynta gudaha ee Guga 2007 waxana laga sameeyey gobollada ay joogaan tirada ugu badan ee dadka barakacay sida gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe, Hiiraan, Mudug, Galgaduud, iyo Baay. Baadhitaanku wuxuu isticmaalay dood lala yeeshay kooxo iyo waraysiyo lala yeeshay dad muhiim ah si loo fahmo siyaabaha ay dhibaatada ugu adkaystaan dadka barakacay iyadoo gaar ahaan lagu nuuxnuuxsanayo fursad-u-helidda cuntada iyo dakhliga iyo weliba helitaanka iyo fursad u helidda adeegyada aasaasiga ah.
Natiijooyinka baadhitaankani waxay muujiyeen in ka badan 70% dadka barakacay ay shaqo la'yihiin iyo in ka badan 80% aanay helin xawaalad. La'aanta taageero bulsho waxa sii xumaysay iyadoo aanay jirin fursado shaqo goobaha ay u qaxeen. Tusaale ahaan, goobaha ugu muhiimsan beeraha sida gobollada Shabeellooyinka, roobabkii Guga 2007 iyo soosaarka dalagga ee liitay waxay keeneen in guud ahaan fursadaha shaqadu ay yaraadeen – xitaa marka la eego bulshooyinka dhulkaa deggan ee martida loo yahay. La'aanta fursado dakhli iyo qiimaha cuntada dibedda laga keeno iyo ta gudaha oo sarreeya siina kordhaya waxa sii xumeeyey fursad-u-helidda cuntada ee dadka barakacay oo horeba u koobnayd. Tusaale ahaan, gobolka Mudug qiimaha bariisku wuxuu kordhay 62% taasoo ka sarraysa qiima korodhka caadiga u ah xilligan ee la filayay taniyo bishii 1aad, qiimaha saliidda wax lagu karsadaana wuxuu kordhay 71% gobolka Hiiraan isla muddadaas. Qiimaha gallayda ee gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe, inkasta oo uu ka sarreeyo 10% keliya celceliska bishii 7aad, haddana waxa la filayaa inuu sii kordho ama uu ka sarreeyo caadi bilaha soo socda soosaarka oo hooseeya dartiis.

Waxa walaac intan ka badan leh in ka badan 80% dadka barakacay la soo sheegay inaanay fursad-u-helin biyo nadiif iyo in fursad-u-helidda musquluhu ay aad u liidato, gaar ahaan degmooyinka ay dadka ugu badan ee barakacay isugu uruureen. Waxa xusid gaar ah leh in 30% degmooyinka ay joogaan tiro badan oo dadka barakacay ay yihiin kuwa lagu tilmaamay inay ku jiraan xaalad ah Gurmad Bina-aadamnimo (Khariidadda 1). Si aad u hesho war dheeraad ah iyo natiijooyinka ka soo baxay Baadhitaanka Saamaynta Dadka Barakacay ee Guga 2007, fadlan la soo xidhiidh FSAU.


## BEERAHA

**Sanduuqa 2: Qiyaasaha Soo saarka Midhaha/firrida ee Guga 2007 – Koonfurta Soomaaliya**

| Gobollada | Soosaarka Guga 2007 oo ah MT | | | Guga 2007 oo ah % Gugii 2006 | Guga 2007 oo ah % Guga Celceliska Dagaalkii Kadib (1995-2006) | Guga 2007 oo ah % Celce-liska Shan Sano ee Guga (2002-2006) |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Hadhuudh/ Masaggo | Gallay | Wadarta Dalagga | | | |
| Bakool | 120 | 10 | 130 | 9% | 5% | 14% |
| Baay | 2,910 | 180 | 3,090 | 8% | 8% | 9% |
| Gedo | 10 | 80 | 90 | 2% | 1% | 2% |
| Hiiraan | 1,270 | 640 | 1,910 | 132% | 46% | 126% |
| Jubbada Hoose | 20 | 3,020 | 3,040 | 570% | 51% | 98% |
| Shabeellada Hoose | 1,560 | 25,740 | 27,300 | 58% | 41% | 39% |
| Jubbada Dhexe | 270 | 4,780 | 5,050 | 460% | 55% | 108% |
| Shabeellada Dhexe | 1,680 | 6,300 | 7,980 | 43% | 46% | 43% |
| Wadarta Guga 2007 | 7,840 | 40,750 | 48,590 | 43% | 31% | 36% |

Waxa laga soo qaatay: Baadhitaanka Midhaha/firrida ee FSAU Guga 2007 Kadib

**Jaantus 1: Soosaarka Dalagga ee Guga (1995-2007)**




Soosaarka dalagga Guga 2007 ee koonfurta Soomaaliya waxa lagu qiyaasay inuu yahay 48,600 MT, kaasoo 84% uu yahay gallay, 16%na hadhuudh/masaggo. Kani waa kii ugu hooseeyey ee soosaarka dalagga saddex iyo tobankii sano ee la soo dhaafay, waxana uu u dhigmaa 31% keliya soosaarkii 1995 illaa 2006 Celceliska Dagaalkii Kadib iyo 43% soosaarkii Gugii 2006 (Sanduuqa 2 iyo Jaantus 1). Badi soosaarku wuxuu ka soo baxay dhulka webiyada iyo goobaha la waraabiyo, maddaama badi soosaarka ku baxa roobabka aan lagu guulaysan ama uu aad caadi uga hooseeyo.
Saddex gobol oo kala ah Gedo, Bakool iyo Baay, waxa soo food saartay in si buuxda loogu fashilmay soosaarka midhaha/firrida, iyadoo soosaarka dalaggu qiyaastii uu ahaa keliya 1% Gedo, 5% Bakool iyo 8% Baay Celceliska Dagaalkii Kadib "CDK" (1995 – 2006) iyo 2% Gedo, 9% Bakool iyo 8% Baay soosaarkii Guga 2006. Gobollada kale ee koonfurta Soomaaliya, soosaarka dalaggu wuxuu u dhaxeeyey 40–55% Celceliska Dagaalkii Kadib ee soosaarka Guga (1995 – 2006). Gobollada Shabeellooyinka, oo ah "kuwa ugu badan ee soo saarka gallayda" oo u gudbiya saadka soosaarka dalagga badi koonfurta Soomaaliya, waxay soo saareen keliya 44% Celceliska Dagaalkii Kadib ee gallayda ee Guga (1995-2006) iyo 60% soosaarkii gallayda ee Gugii 2006.

Gobollada Jubbada Hoose iyo Dhexe iyo Hiiraan, inkastoo soosaarka dalagga ee xilligani uu ka hooseeyey caadi marka loo eego CDK (51%, 55% iyo 46% CDK, siday u kala horreeyaan), haddana soosaarka dalaggu aad ayuu uga sarreeyey soosaarkii Gugii 2006 (570%, 460% iyo 132% soosaarkii Guga 2006, siday u kala horreeyaan) waanuu ka badanaa, ama wuu ku dhowaa celceliska shanta sannadood 2002-2006 (98%, 108%, iyo 126%, siday u kala horreeyaan). Goyntan dalagga ee fiican marka kuwa kale loo eego ee gobollada Jubbooyinka iyo Hiiraan waxa keenay roobabkii Guga ee caadiga ku dhowaa, fursado beeritaanka midhaha ee dhulka biya-fadhiisinka leh, waraabinta isu-dheelitirka dhulka ku salaysan, iyo isticmaalka qalabka waraabinta. Iminka beeritaanka dhulka biya-fadhiisinka leh ee gallayda iyo sisintu way socotaa badi dhulka webiyada ee gobollada Jubbooyinka. FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan waxay ka samayn doonaan gobollada Jubbooyinka qiimayn midhaha/firrida xilliga caadiga ah ka baxsan dhammaadka bisha 9aad.


Soosaarka hadhuudhka/masaggada ee Guga 2007 waa 14% oo keliya Celceliska Dagaalkii Kadib ee Guga sababtoo ah laguma guulaysan soosaarka midhaha ee gobolka Baay kadib roobabkii Guga 2007 oo aad u liitay isla markaana aan si siman u di'in. sidoo kale, soosaarka gallayda ee badi dhulka webiydu waa 44% keliya Celceliska Dagaalkii Kadib ee Guga waayo waxba lagagama guulaysan soosaarka gallayda roobka ku baxdan, soosaarka gallayda la waraabiyaana wuu hooseeyey.

Inkastoo roobabka caadiga ka hooseeya ee aan sida siman u di'ini ay ahaayeen qodob muhiim ah oo keenay guud ahaan soosaarka midhaha ee hooseeya, haddana soosaarka gallayda la waraabiyaa si weyn ayuu uga badan karayay sida uu hadda yahay haddii qalabka waraabinta iyo maaraynta webigu ay ku fillaan lahaayeen. Gobollada Shabeellooyinka, oo ah kuwa gallayda ugu badan soo saara koonfurta, qalabka waraabinta ee ay waxyeelladu ku gaadhay daadadkii Derytii 2006/7 ee la soo dhaafay oo aan la dayac tirin ayaa ahaa caqabadda ugu weyn ee hortaagan wax soosaar weyn. Goobaha qaar ka tirsan degmooyinka Kurtunwaarey iyo Qoryoolay ee gobolka shabeellada Hoose, biyihii daadadkii dhacay bishii 12aad ee sannadkii hore ayaa weli taagan dhul beereed oo ah dhowr kun oo hektar, iyadoo biyo mareennada a ciiddu gashay, meelaha ay biyuhu dhulka hoose maraan iyo daamanka webiyada oo ay waxyeello gaadhay ay sii koobayaan dhulka wax laga beeri karo iyo soosaarka guud. Sidoo kale, daamanka webiyada ee jabay oo weli furan iyo qaababka waraabinta ee ay waxyeelladu gaadhay ayaa la soo sheegay inay caqabad ku yihiin soo saarka dhulka webiyada ee gobollada Jubbooyinka iyo Gedo. Gobolka Baay, oo ah goobta hadhuudhka/masaggada ugu badan laga soo saaro, roobabka oo aan ku fillayn ayaa ahaa caqabadda ugu weyn, hase yeeshee dhibaatooyinka kale ee ay sheegteen beerallaydu waxa ku jiray waxyeello ka timi cayayaan iyo cudurro gala dhirta.

beeraha/xoolaha

Dhulka beera-iyo-xoola-dhaqatada ee waqooyi-galbeed ee gobollada Awdal, Galbeed iyo Togdheer, qiyaasaha abuuritaanka dalaggu way fiicanyihiin waxana la filayaa inay aad uga sarreeyaan caadi roobabkii wanaagsanaa ee sida simman u da'ay dartood. Baadhitaanka abuuritaanka midhaha/firrida ee Guga/Karantu waxay qiyaasayaan in soosaarka dalaggu uu yahay 25,236 MT, taasoo ka dhigan 141% Celceliska Dagaalkii Kadib (1998 – 2006), 101% Gugii 2006 iyo 34% wadarta soo saarka dalagga ee Soomaaliya ee Gugan 2007. Goynta waxa la filayaa sannadkan dabayaaqadiisa bisha 11aad.

**Jaantus 2: Isbeddellada Qiimaha Dalagga ee Heer Gobol (Doolarka Maraykanka) Gobol: Dalag lagu beddalanyo Shaqo**




Inkastoo ay jiraan arrimo u gaar ah gobol kastaa, baadhitaanka soosaarka midhaha ee FSAU iyo falanqaynta dalaggu waxay muujinayaan in qoysas badan oo dhulka miyga ah jooga gobollada Shabeellooyinka, Jubbooyinka iyo Baay inay weli haystaan xoogaa dalag kayd ah oo lagu qiyaasay inay haysn doonaan ilaa shan bilood ama ka badan. Heerka kaydka dalagga gudaha ee dalku wuxuu si wanaagsan ula socdaa soosaarka gudaha ee xilliggan iyo xilliyadii horeba.

Gobolka Baay kaydka dalaggu wuu jiraa goyntii fiicnayd ee hadhuudhka/masaggada ee xilligii hore dartiis (Deyrtii 2006/7 wuxuu ahaa 228% Celceliska Dagaalka Kadib), iyadoo gobollada Jubbooyinka ay u sabab tahay soosaarkii Deyrtii 2006/7 oo caadi ka sarreeyey goobaha qaar, soosaarka xilliga caadiga ah ka baxsan ee dhulka biya-fadhiisinka ah (bishii 3aad/4aad ee 2007), iyo soosaarka xilligan oo caadi ku dhow oo ay wehliso in cunto gargaar ah la qaybiyey intii u dhaxaysay bishii 3aad – bishii 7aad ee 2007.Gobollada Shabeellooyinka, qoysaska hantidooda ama dakhligoodu uu dhexdhexaadka yahay iyo kuwa ladani waxay haystaan dalag kayd ah maddaama soosaarka caadiga ka hooseeya ay macnihiisu noqon doonto in suuqa loo iib geeyo dalag sidii hore ka yar halkii kaydka isticmaalka qoyska loogu talagalay uu ka yaraan lahaa.


Qiimaha dalaggu aad ayuu u kordhay badi gobollada taniyo bishii 1aad ee 2007 kadib isbeddelleda xilliga oo caadi ah, laakiin heerarkoodu way kordheen. Hase yeeshee, qiimaha dalaggu weli wuu hooseeyaa ama in yar ayuu caadi ka sarreeyaa badi gobollada (Jaantus 2). Gobollada Shabeellooyinka oo badhtilmaameed u ah xiisadda hadda taagan ee bina-aadamnimada qiimaha dalaggu wuu kordhay taasoo ay keeneen arrimaha isweheshaday ee ay ka midka yihiin goynta dalagga oo hoosaysay, baahida loo qabo dalagga ee dhulka miyiga ah oo kordhay sababtoo ah tirada badan ee dadka soo barakacay, iyo shilinka Soomaaliya ee qiima dhacay oo keenay inuu kordhay kharashka soosaarka iyo gaadiidku. Gobollada Shabeellooyinka qiimaha gallaydu wuxuu kordhay 107% intii u dhaxaysay bishii 1aad iyo bishii 7aad ee 2007. Hase yeeshee, qiimaha gallaydu weli wuu hooseeya marka loo eego kuwii hore, 10% keliya ayuu ka sarreeyaa celeceliska qiimaha bisha 7aad ee 2002 – 2006.

Gobollada Jubbooyinka qiima kac sidan oo kele ah ayaa lagu arkay. Tusaale ahaan, qiimaha gallaydu wuxuu kordhay 63% intii u dhaxaysay bishii 1aad iyo bishii 7aad ee 2007, hase yeeshee, qiimihii bishii 7aad ee 2007weli 25% ayuu ka hooseeyaa celceliska qiimaha shanta sano (2002 – 2006) (Jaantus 2). Soosaarka xilliga caadiga ah ka baxsan ee Deyrtii 2006/07 ee kordhay, cuntada gargaarka ah ee la qaybiyey (bishii 3aad – bishii 7aad ee 2007), soosaarka dalagga Guga 2007 oo fiican iyo rajo wanaagsan oo laga qabo midhaha xilliga caadiga ah ka baxsan ee hadda taagan ama baxaya ayaa xasillinaya qiimaha dalagga ee gobolkan.

Dhulka hadhuudhka ugu badani uu ka baxo oo ay ku jiraan qaybo ka mid ah gobollada Gedo, Hiiraan, Bakool iyo Baay oo goynta Gugu ay liidatay, qiimaha hadhuudhku wuxuu kordhay 52% intii u dhaxaysay bishii 1aad iyo bishii 7aad ee 2007, laakiin qiimaha hadhuudhka ee haddu 10% keliya ayuu ka sarreeyaa qiimihii bishii 7aad ee 2006, 12%na wuxuu ka sarreeyaa celceliska shanta sano ee qiimaha bisha 7aad. Natiijooyinka qiimayntu waxay tilmaamayaan in kaydka dalaggu uu badanyahay gobolkaas, laakiin waxa jirta in ganacsatadu ay qarinayaan iyagoo filaya in qiimuhu uu sii kordho.

Bilaha soo socda, qiimaha dalaggu waxa la filayaa inuu ku wado inuu sii kordho sababtoo ah  roobabkii Guga 2007 oo liitay iyo saadka dalagga oo hooseeya dartood. Qaska ku dhacay suuqa Bakaaraha ee Muqdisho iyo ganacsiga ka dhexeeya gobollada oo koobmay, jid-goynta iyo colaadda sokeeye ee sii korodhay waxay wiiqi doonaan socodka ganacsiga dalagga ee dalka gudihiisa. FSAU aad ayay u kormeeri doonta howlgelidda suuqa, socodka iyo qiimaha dalagga ee suuqyada waaweyn ee la tix-raaco bilaha soo socda.

**Jaantus 3: Isbeddellada  Iswaydaarsiga Ganacsiga ee Heer Gobol: Dalag lagu Beddelanyo Shaqo**




Hoos u dhaca howlaha beeraha ee la xidhiidha fursadaha shaqada ee beeraha ee ay u sabab tahay midhaha Guga 2007 ee aan lagu guulaysanini wuxuu keenay in shaqada iyo fursadaha dakhliga ee qoysaska saboolka ahi ay hoos u dhaceen. Dhammaan gobollada koonfurta, waayidda dakhliga iyo qiimaha dalagga ee kordhay waxay taabteen awoodda wax iibsiga ee qoysaska (Jaantus 3). Tusaale ahaan, gobollada Shabeellooyinka, goobaha Hadhuudhka ugu badan laga beero iyo gobollada Jubbooyinka, iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya shaqada iyo dalaggu wuxuu hoos u dhacay 69%, 31% iyo 32% sida ay u kala horreeyaan, intii u dhaxaysay bishii 1aad iyo bishii 7aad ee 2007. Marka la barbar dhigo bishii 7aad ee sannadkii la soo dhaafay, iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya dalagga iyo shaqadu iminka wuu hooseeyaa gobollada Shabeellooyinka (46%), goobaha Hadhuudhka ugu badan laga beero (23%) iyo gobollada Jubbooyinka (19%). Bilaha soo socda waxa muhiim noqon doonta in aad loo kormeero helitaanka fursadaha shaqada beeraha iyo mushahaarada marka loo eego qiimaha dalagga.


## XOOLAHA

Inkastoo guud ahaan sida roobabka Guga 2007 ay u da'een ay liidatay, haddana xaaladaha seeraha ee badi goobuhu way ku filanyihiin xoolaha illaa roobabka Deyrta dambe. Waxana tan u sabab ah arrimaha isbiirsaday ee ay ka midka yihiin roobabkii Gugii 2006 iyo Deyrtii 2006/7 ee fiicnaa iyo roobabki Guga 2007 ee sida fiican ku billaabmay oo si wanaagsan dib ugu soo cusboonaysiiyey daaqa iyo saadka biyaha ee dhulka hoose. Roobab Guga 2007 oo caadi ah ama ka sarreeya ayaa ka da'ay qaybo ka mid ah gobollada Jubbooyinka, waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed

oo keenay in xaaladaha seeruhu ay hore u mareen oo ay ku jirto inay korodhay fursad-u-helidda biyaha ee dhulka miyiga ah. Goobaha kale waxa soo food saartay inay sii xumaanayaan xaaladaha biyaha iyo daaqu. Labada gobol ee walaaca laga qabaa waxa weeye gobollada Dhexe iyo Shabeellada Dhexe. Berkadaha iyo biya-galeennada gobollada Mudug iyo Galgaduud horeba way u qalaleen waxana la billaabay biya-dhaamis laba bilood ka hor sida caadiga ah, iyadoo yaraanta biyaha iyo daaqa ee gobolka Shabeellada Dhexe ay keenayso inay ka sii daraan xaaladaha xooluhu iyo in la sameeyey guuritaan xoolaha ah oo aan caadi ahayn oo loo hayaamo gobolka Shabeellada Hoose.

Isbeddelada guuritaanka xooluhu waa caadi badi gobollada, marka laga reebo xoogaa guuritaan ah oo lagu raadinayo biyo iyo daaq (Khariidadda 5). Goobaha guuritaankaasi ka dhacay waxa ku jira xoolo ka guuray bariga Sanaag oo u hayaamay Nugaal gobolka Sool, iyo xoolo ka guuray waqooyiga Mudug oo u hayaamay Hawdka Galdogob iyo degmada Burtiinle. Koonfurta, xoolo ka guuray koonfurta Gedo ayaa xilligan u guuray gobollada Jubbooyinka oo helitaanka daaqa iyo biyuhu uu ka fiicanyahay. Guuritaan xoolaha oo kooban laakiin caadi ah oo laga gudbay soohdinta ayaa laga soo sheegay goobta shinniile ee Itoobiya oo u tallaabay Guban ee goboka Awdal.

**Khariidadda 5: Isbeddellada Guuritaanka Xoolaha ee Soomaaliya (Bisha 7aad – Bisha 10aad ee 2007))**




Waxa laga soo qaatay: Baadhitaanka Midhaha/firrida ee FSAU Guga 2007 Kadib

Guud ahaan xaaladaha jidhka ee dhammaan xooluhu waa caadi ama way wanaagsanyihiin, inkastoo qaybo ka mid ah gobollada Shabeellada Dhexe, Hiiraan, Mudug iyo Galgaduud, xaaladaha jidhka xooluhu ay xumaanayaan. Heerarka dhalmada geela iyo lo'da ee xilliga Guga 2007 way hooseeyeen waqooyi-galbeed, waqooyi-bari, Dhexe, Hiiraan, Gedo iyo Bakool waayo heerarka rimidda ayaa sarreeyey xilligii xagaaga ee 2006 (bishii 8aad-bishii 10aad) iyo Deyrtii 2006/7. Sidaas darteed soosaarka caanuhu wuu hooseeyaa gobolladaasi. Gobollada Jubbooyinka, Shabeellooyinka iyo Baay, heerarka dhalmada ee geela iyo adhigu waa caadi. Waxa intaas dheer, dhalmada adhigu waa caadi ama way sarraysaa badi gobollada. Baadhitaanka Isbeddellada Tirada Xoolaha ee xoola-dhaqatada ee Qiimaynta Guga 2007 ee FSAU waxay xaqiijinaysaa in tirada xoolaha ee xoola-dhaqato iyo beera-iyo-xoola-dhaqato badani ay si buuxda uga soo kabteen diiftii abaartii 2003/4 gobollada waqooyiga iyo abaartii 2005/06 gobollada koonfurta iyo dhexe. Hase yeeshe, waxa sidan ka reebban beera-iyo-xoola-dhaqatada Jubbooyinka iyo beera-iyo-xoola-dhaqatada Koonfureed ee gobollada Jubbooyinka iyo Gedo, Lo' dhaqatada Daawa ee gobolka Gedo, iyo lo' dhaqatada Koonfurta-bari ee gobollada Jubbooyinka iyo Baay (eeg Khariidadda Hab-nololeedka ee ku jirta Websaytka FSAU). Sida ay sheegayaan natiijooyinku falanqaynta isbeddellada tirada xoolaha ee hab-nololeedka lo' dhaqatadu wuxuu u baahan doonaa ugu yaraan laba xilli oo kale oo roobabku ay caadi yihiin si ay u helaan heerar tirada xoolaha ah oo caadi ah. Guud ahaan, ma jiraan cudurro waaweyn oo xoolaha gala oo dillaacay, hase yeeshee cudurrada fida ee sida Sambabka, Furuqa iyo Shilinta/qaniin ayaa ku wada inay saamaynayaan maqasha iyo geela. Cudur aan la aqoon oo geela gala oo iminka loo yaqaan"cudurka Geerida Degdegga ah keena" oo laga soo sheegay bishii 3aad ee 2007 gobollada Jubbooyinku iminka kama jiro gobolladaas waxase la soo sheegay inuu ka jiro degmooyinka Kiiniya ee ay deriska yihiin.

Qiimaha dhammaan noocyada xoolaha (geela, lo'da, adhiga) si weyn ayuu u kordhay 12kii bilood ee la soo dhaafay, iminkana wuxuu gaadhay heerarkii ugu sarreeyey marka loo eego isbeddellada muddada dheer waayo waxa wanaagsanaaday duruufaha jidhka xoolaha, waxana kordhay baahida loo qabo xoolaha la dhoofiyo iyo kuwa dibaaxa/dhaqashada (Jaantus 4). Qiimaha lo/da ee gobollada Jubbooyinka iyo kuwa hadhuudhka ugu badani uu ka baxo iminka 27% iyo 26% ayuu uga sarreeyaa celceliska shanta sano (2002-06). Sidoo kale gobollada dhexe iyo waqooyiga, qiimaha xooluhu wuxuu ku wadaa inuu sii kordhayay 12kii bilood ee la soo dhaafay. Celceliska qiimaha riyaha dibedda loo dhoofiyaa bishii 7aad wuxuu ka sarreeyey 24% marka loo eego siduu ahaa bishii 7aad ee sannadkii hore. Sidoo kale, qiimaha riyaha dibaaxa/dhaqashada ee gobollada dhexe, waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed waxay ka sarreeyaa 20%, 29% iyo 43% marka loo eego celceliska shanta sano. Iswaydaarsiga ganacsiga ee xoolaha oo lagu beddelanyo dalag hoos ayuu u dhacay taniyo bishii 1aad ee 2007 qiimaha dalagga ee kacay dartiis, hase yeeshee weli wuu fiicanyahay marka loo eego shantii sano ee la soo dhaafay (eeg Warbixinta Xogta Suuqa ee FSAU, Bisha 7aad ee 2007).

Suuqa lo'da ee Gaarisa (Kiiniya) si buuxda ayuu u shaqaynayaa wararka gudaha ka imanayaana waxay sheegayaan in ganacsiga lo'da ee soohdinta koonfurta Soomaaliya iyo Kiiniya isaga gudbaa uu socodo dibna looga soo kabtay saamayntii cudurkii Dooxada Rift ee la xaqiijiyey inuu ka jiro Kiiniya iyo soohdinta Kiiniya iyo Soomaaliya ee la xidhay sannadkan horraantiisii. Sidoo kale, inkastoo ay jiraan mamnuucidda lagu soo rogay dhoofinta xoolaha nool ee laga qaado Soomaaliya ee la geeyo dalalka Gacanka Carabtu sannadkan billowgiisi iyo dhibaatooyinka la xidhiidha fasaxa ganacsiga dhoofintu, haddana wadarta adhiga laga dhoofiyey dekedaha Berbera iyo Boosaaso intii u dhaxaysay bishii 7aad ee 2006 illaa bisha 6aad ee 2007 waxay ahayd 2,625,511 taasoo 30% ka sarraysay celceliska shanta sano ee wadarta xoolaha la dhoofiyey. Marka laga reebo Salaydda hilibka lagu qalo ee Burco, sayladaha kale ee dalka (siiba kuwa ku yaalla koonfurta/dhexe) iminka way xidhanyihiin manay dhoofin hilib la qaboojiyey taniyo bishii 1aad ee 2007 dhoofinta xoolaha ee la mumnuucay iyo nabad la'aanta goobaha qaar dartood.

**Jaantus 4:Isbeddelada qiimaha Riyaha dibaaxa/Dhaqashada ee Heer Gobol (Doolarka Maraykanka)**





xoolaha

suuqyada/ nafaqada

SUUQYADA

Si weyn oo degdeg ah ayuu u qiima jabay Shilinka Soomaaliya , 33-36%, marka loo eego Doolarka Maraykanka taniyo bishii 1aad, taasoo jabisay muddo saddex sano ah oo uu xasilloonaa (Jaantus 5). Qiima jabkani lix bilood gudahood ayuu ku dhacay waxana keenay arrimaha isbiirsaday ee colaadda sokeeye ee sii korodhay (gaar ahaan gobollada Shabeellooyinka), qaska ku dhacay ganacsiga ee Suuqa weyn ee Bakaaraha ee Muqdisho iyo arrinta kuwan ka muhiimsan ee ah in tiro badan lagu soo kordhiyey saadka lacagta warqadda ah ee Shilinka Soomaaliya iyadoo la sameeyey daabacaad heerar sare ah oo la soo cusboonaysiiyey. Magaalada Muqdisho, Shilinku wuxuu lumiyey qiimihiisii 38%, isagoo ka soo dhacay ShSo 14,160 bishii 1aad noqdayna ShSo 19,500 marka loo eego Doolarka bishii 7aad. Suuqyada Boosaaso iyo Gaalkacayo (oo ah suuqyo weyn oo la tix raaco gobollada waqooyiga iyo dhexe), Shilinku wuxuu qiima dhacay 47% iyo 43%, siday u kala horreeyaan. Isbeddello kuwan la mid ah ayaa lagu arkay Koonfurta gaar ahaan Beled weyne, (37%), Baydhaba (28%) iyo Kismaayo (22%).

**Jaantus 4: Isbeddellada Qiimaha Riyaha Dibaaxa ee Heer Gobol (Doolarka Markaykanka)**




Waxa sedan ka duwan Shilinka Soomaalilaand oo ku wada inuu xasilloonaa isla muddadan iyadoo qiimihiisu uu yahay ShSl 6,300 Doolarka Maraykanka suuqa Hargeysa (Jaantus 5). Suuqyada qaar muhiim ah sida Burco, mamnuucida uu maamulka soomaalilaand ku soo rogay isticmaalka shilinka cusub ee Soomaaliya ayaa keentay in la sameeyo cabashooyin. Waqooyi-bari (Garoowe iyo Boosaaso) waxa ka dhacay bannaanbaxyo lagaga cabanayo daabacadda lacagta warqadda ah ee cusub iyo saamaynta ay taasi ku leedahay sicir-bararka.

Shilinka Soomaaliy ee sida dhakhsaha ah u qiima jabay dartiis, waxa dhacay sicir-barar degdeg ah iyo in si aan caadi ahayn uu u kacay qiimaha badeecadda dibedda laga keenaa isla muddadan. Qiimaha badeecadda dibedda laga keeno sida sonkorta bariiska, saliidda wax lagu karsado iyo baatroolu si weyn ayuu u kordhay. Intii u dhaxaysay bishii 1aad iyo bishii 7aad, qiimaha bariiska ee gobollada waqooyiga iyo dhexe, gaarahaan Boosaaso iyo Gaalkacayo wuxuu kordhay 59% iyo 78%, siday u kala horreeyaan. Koonfurta, qiimaha bariisku wuxuu kordhay gobollada Jubbooyinka 37%, Shabeellooyinka 39%, goobaha hadhuudhka ugu badani uu ka baxana 66%. Qiimaha shiidaalku isna wuu kordhay badi suuqyada qiimaha shiidaalka adduunka oo kordhay, bedeecadda dibedda laga keeno oo qasantay iyo ganacsiga gobollada ka dhexeeya oo koobmay dartood. Intii u dhaxaysay bishii 1aad iyo bishii 7aad ee sannadkan, qiimaha baatroolku wuxuu kacay ka badan 60% Muqdisho iyo gobollada Shabeellooyinka iyo 30% Jubbooyinka, gobollada dhexe wuxuu kordhay 29%, goobaha uu hadhuudhka ugu badani ka baxana wuxuu kordhay 24% (eeg Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWS NET, Bisha 8aad ee 2007). Marka la tixgeliyo sid ay isbeddelada qiimaha ee xilligu u taabanayaan, qiime kordhka haddu aad ayuu u weynyahay. Sicir-bararka iyo qiimaha kordhay waxay si toos ah u taabanayaan hubinta cuntada iyo hab-nololeedka, gaar ahaan dadka magaalooyinka ee saboolka ah iyo dadka barakacay ee ku tiirsan inay suuqa wax ka iibsadaan.

NAFAQADA


Falanqayn tafatiran oo laga sameeyey warka[1] nafaqada ee la uruuriyey bishii 3aad illaa bishii 7aad waxay muujinaysaan xaalad nafaqo oo kala duwan dalka (Khariidadda 6 iyo 7). Laba waxyaabood oo waaweyn oo naxdin leh ayaa dhacay lixdii bilood ee la soo dhaafay. Kuwaasoo ah dillaaca cudurka Shuban Biyoodka oo saameeyey badi qaybaha dalka iyo dadka dhowaan ka soo barakacay Muqdisho waxana weeye laba arrimood oo muhiim ka ah falanqaynta hadda. Dillaaca Shuban Biyoodka ee koonfurta iyo dhexe ee Soomaaliya waxuu keenay inay cudurkaas qaadeen dad ay tiradoodu ku dhowdahay 40,000 bishii 1aad illaa bishii 6aad dadka u geeriyooday cudurkaasna waxa lagu qiyaasay 1,133. Hase yeeshee, ugu dambaystii waxa muuqata in tirada dadka cudurkaas qaaday ay yaraadeen laga billaabo bishii 7aad saddexda goobood ee sida ugu xun u saamoobay (Jubbada Dhexe iyo Hoose iyo Banaadir), gobollada kale laguma arag dad cusub oo cudurkaas qaaday. Waqooyi-bari, wadarta dadka cudurkaas qaaday ee la soo sheegay waxay ahaayeen 3,864 oo qof bishii 1aad illaa bishii 8aad, geerida la xidhiidhay cudurkanina waxay ahayd 46 qof.




*Dumar biyo la cabbo ka soo qaadanaya wadada, Shabeellooyinka, Bishii 5aad ee 2007, FSAU.*

Falanqaynta walaaca ugu weyn waxa laga qabaa xaaladda sida weyn uga sii daraysa ee gobollada shabeellooyinka, oo keentay in heerarka Nafaqa-darrada guud ee xumi ay gaadheen 17%[2], taasoo ka sarraysa heerarka gurmadka ee 15%, waxana jira heerar walaac weyn leh oo ah nafaqa-darro aad u xun oo ka sarreeya 4%. Sidii hore loo tilmaamay, tan waxa keenay arrimo naxdin leh oo isbiirsaday oo si xun u taabtay nafaqada iyo fayada dadweynaha dhulka webiyada iyo beera-iyo-xoola-dhaqatada. Qiimayn degdeg ah oo dhowaan la sameeyey oo la cabiray cududda oo ay samaysay hay'adda MSF Swiss waxay muujisay xaaladda nafaqaddu inay aad u xuntahay dadka cusub oo soo barakacay ee jooga magaalada Afgooye agteeda.

**Khariidadda 6: Xaaladda Nafaqada ee Bisha 1aad ee 2007**




**Khariidadda 7: Xaaladda Nafaqada ee Bisha 7aad ee 2007**




Laba goobood oo kale oo muujinaya heerar nafaqa-darro oo aad Halis u ah waa dadka muddada dheer ku barakacsanaa Gaalkacayo iyo Boosaaso, taasoo lala xidhiidhiyey teyada iyo adeegyada caafimaadka, biyaha, iyo faya-dhowrka oo liita. Qiimayn hore oo degdeg ah oo lagu qiyaasay cududda oo ay ka samaysay FSAU magaalada Baydhaba bishii 3aad kadib dadka cusub ee soo barakacay, waxay iyana muujinaysaa heerar nafaqa-darro oo aad Halis u ah oo carruurta ah (21%), inkastoo qiimayn dambe oo la sameeyey bishii 7aad ay muujisay isbeddello horumar ah (12%).

Falanqaynta baadhitaanka nafaqada ee laga sameeyey Soomaaliya (n=84) lixdii sannadood ee la soo dhaafay waxay tilmaantay xidhiidhka weyn ee ka dhexeeya shubanka iyo nafaqa-darrada xun oo ay keenaan teyada biyaha la cabbo, faya-dhowrka iyo qaababka daryeelka carruurta oo liita. Tan waxa asddaan u ah heerar sare oo nafaqa-darro xun oo joogto ah oo ka jiray dhowrkii sannadood ee u dambeeyey qaybo badan oo ka tirsan koonfurta iyo dhexe ee Soomaaliya (Gedo, Baay, Bakool, iyo Hiiraan), inkastoo helitaanka iyo fursad-u-helidda cuntadu ay fiicnaatay. Xaaladda hadda ee nafaqadu mar kale waxay muujinaysaa isbeddello la mid ah kuwii Derytii 2006/7 gobollo badan, iyo xaalad nafaqo oo joogto ah laakiin Halis ah. Gobolladaas waxa ku jira Baay, Bakool, Gedo iyo qayb ka mid ah Hiiraan. Waxa ka reebban hab-nololeedyada dhulka miyiga ah ee degmooyinka Buur-xakaba, Jalalaqsi iyo Buulo Burti, taasoo muujisay in xaaladdu ay ka sii xumaatay nafaq-darro aad u Adag Deyrtii 2006/07 oo ay noqotay Halis kadib saamayntii dadweynaha cusub ee soo barakacay ee tegay degmadaas iyo dillaaca cudurka Shuban Biyoodka (Khariidadda 6 iyo 7).

Hase yeeshee, xoogaa isbeddello wanaagsan oo ku saabsan xaaladda nafaqada ayaa laga soo sheegay gobollada Jubbooyinka iyadoo dhammaan saddexda hab-nololeed ee dhulka miyiga ay xaaladdu hore uga martay siday ahayd Deyrtii 2006/07. Natiijooyinka qiimaynta nafaqada ee dadweynaha beera-iyo-xoola-dhaqatada iyo xoola-dhaqatadu iminka waxay muujinayaan xaalad nafaqo oo aad u Adag, iyadoo hoos uga soo dhacday Halis, iyo xaalad Halis ah dadweynaha dhulka webiyada oo hoos uga soo degay Xaalad Aad Halis u ah bishii 1aad ee 2007 (Khariidadda 6 iyo 7). Horumarkaasi wuxuu la socdaa tilmaamaha hubinta cuntada ee wanagaasanaatay, waxana ay u eegtay in laga faa'iidaystay jawaab-celinta bina-aadamnimada ee fiicnaatay gobolkaas lixdii bilood ee la soo dhaafay.

Waqooyi-bari, xaaladdu way kala duwantahay hab-nololeedyada, mana jiro isbeddel weyn tanyo falanqayntii Deyrtii 2006/7. Hase yeeshee hab-nololeedyada Xeebta Deex, waxa lagu arkay xaalad nafaqo oo Halis ah bishii 6aad taasoo la socota isbeddellada la filayay marka la eego kalluun la'aanta xilligan sannadka oo baddu ay kacsantahay. Goobaha kale waxay ku jiraan heerar ah Feejignaan iyo Adag marka laga reebo dadka muddada dheer barakacsanaa, sidii hore looga soo sheegay Boosaaso iyo Gaalkacayo, goobahaas oo xaaladda nafaqadu ay Aad Halis u tahay.

Ugu dambaystii, Waqooyi-galbeed guud ahaan xaaladda nafaqadu waxay ku waddaa inay weli ku jirto heerar Feejignaan taasoo la socota falanqayntii Deyrtii 2006/7. Hase yeeshee, hab-nololeedka Bariga Golis ee dhulka xeebta in yar ayay kor u kaceen heerkarka nafaqa-darrada xun ee carruurtu, inkasta oo ay weli aad u hooseeyaan haddana waxa la tilmaamay in aad loo kormeero. Falanqayn intan ka faahfahin badan oo xaaladda nafaqada ah waxad ka helaysaa Warbixinta Bishii ee Nafaqada ee bisha 7aad ee 2007.

### ARRIMAHA UGU MUHIIMSAN GOBOLLADA

### GOBOLKA KOONFURTA

Xaaladda guud ee hubinta cuntada ee gobollada koonfurta Soomaaliya way kala duwantahay; goobaha qaar waxay ku wadaan inay fiicnaanayaan taniyo Derytii 2006/7, kuwo kalena way ka sii dareen. Waxa iminka lagu qiyaasay in 785,000 oo qof oo jooga koonfurtu ay ku jiraan **gurmad Bina-aadamnimo** ama **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun**, waxana ay u baahanyahay gargaar bina-aadamnimo oo degdeg ah iyo mid lagu badbaadinayo hab-nololeedkooda. 785,000 ee qof ee saamoobay 490,000 oo ka mid ahi waxay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) 295,000** qofna waxay ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)**. Tani waxay keentay inay wadarta tirada dadka ku jira XCHAX iyo GB ay koroday 33% bishii 1aad – bishii 6aad ee 2007 waayo gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe waxay si degdeg u galeen **Gurmad Bina-aadamnimo.** Wadarta tirada 785,000 oo qof oo ku jira **XCHAX** iyo **GB** koonfurta Soomaaliya, in ka badan kala badh ama 51% ayaa jooga gobollada Shabeellooyinka. Badi ama 85% dadka ku jira **GB** iyo 36% dadka ku jira **XCHAX** waxay joogaan gobollada Shabeellada Hoose iyo Dhexe.

***Gobollada Shabeellooyinka***

Xaaladda hubinta cuntada iyo nafaqada ee labada hab-nololeed ee ugu muhiimsan (dhulka webiyada iyo beera-iyo-xoola-dhaqatada) ee gobollada Shabeellooyinka waxay u adkaysanayeen arrimo naxdin leh oo in ka badan toban sano. Hase yeeshee, gobolladani iminka waxa soo food saaray **Gurmad Bina-aadamnimo** iyo **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** oo heerkoodu uu aad u weynyahay sababtoo ah arrimaha naxdinta leh ee isbiirsaday ee ay ka midka yihiin dhowr xilli roobaad oo caadi ka hooseeyey iyo soosaarka dalagga oo liitay, qiimo sare iyo sicir-barar sii kordhaya oo la xidhiidha badeecadda cuntada ah iyo ta aan ahayn, howlaha dhaqaalaha iyo ganacsiga oo qasmay, tiro badan oo aan xasilloonay oo ah dad ka soo qaxay Muqdisho, dillaaca cudurka Shuban Biyoodka, heerar si degdeg ah u sii kordhaya oo ah nafaqa-darro xun, iyo colaadda sokeeye ee soo noqnoqonaysa.

Gobollada Shabeellooyinka, oo ah “kuwa cuntada ugu badan u soo saara” Soomaaliya waxa soo food saaray xilligan heerarkii soosaarka dalagga ee ugu hooseeyey in ka badan toban sano (44% of Celceliska Dagaalka kadib “CDK”), sababta ugu weyn oo ah roobabkii xilliga Guga 2007 oo aad u hooseeyey, qalabka waraabinta oo liitay iyo daamanka webiga ee ay waxyeelladu ku gaadhay daadadkii Deyrtii 2006/7. Fursad-u-helidda suuqyada iyana waxa koobay heerarka sare ee sicir-bararka oo aad u kordhay (qiimaha dalagga gudaha iyo badeecadda dibedda laga keenaaba wuxuu kordhay 40% illaa 60% qaybtii hore ee sannadkan 2007), taasoo keentay inuu si weyn hoos ugu dhacay iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya mushahaarada shaqada iyo dalagga. Waxyaabaha kale ee naxdinta leh ee dhacay waxa ku jira, tiro badan oo ah dadka ka soo qaxay Muqdisho iyo saamaynta ay ku leeyihiin bulshooyinka ay martida u yihiin, colaadda sokeeye ee sii socta ee keenaysa inay qasmeen howlaha dhaqaalaha iyo socodka ganacsiga (oo ay ku jirto xidhitaanka dekedda iyo suuqa Bakaaraha ee Muqdisho iyo taasi qaska ay u keentay ganacsiga), dillaaca cudurka Shuban Biyoodka iyo xaaladaha caafimaadka ee sii xumaanaya kadib daadadkii xumaa ee dhacay bishii 11aad iyo bishii 12aad ee 2006 oo keenay inay sumeebeen biyaha la cabbaa iyo inay yaraatay fursad-u-hellidda adeegyada daryeelka caafimaadku .

Walaaca ugu weyn waxa laga qabaa heerarka sida degdegga ee weyn u sii xumaanaya ee nafaqa-darrada guud ee dadweynaha dhulka webiyada iyo beera-iyo-xoola-dhaqatada ee gobollada Shabeellooyinka. Dadweynaha dhulka webiyada ee Shabeellooyinka waxa la diiwaangeliyey heerar nafaqa-darrada guud ah (GAM) oo ah 17.0% (13.4 - 20.6), dadweynaha beera-iyo-xoola-dhaqatada ee Shabeellooyinkana waxa la diiwaangeliyey 17.3% (13.3 – 21.3), labadubana way ka sarreeyaan heerarka gurmadka ee 15%. Walaac kan ka weyn waxa laga qabaa heerarka sida la yaabka leh u sarreeya ee nafaqa-darrada aadka u xun (SAM) ee ka sarreeya heerarka gurmadka ee 4%. Sida dhakhsaha ah ee weyn ee ay u xumaatay xaaladda nafaqada ee dadka dhulka miyiga ah jooga oo kor uga kacday heerkii ay taagnayn xilligii Deyrtii 2006/7 oo ay ahayd **Feejignaan** oo noqootay **Halis** (iyadoo ka boodday heerka Adag) waa arrin walaac weyn leh (eeg Khariidadda 6 iyo 7).

***Gobollada Jubbooyinka iyo Gedo***

Hase yeeshee, hubinta cuntada iyo hab-nololeedka ee gobollada Jubbooyinka iyo Gedo waxay ku waddaa inay muujinayso horumar weyn marka loo eego siday ahayd abaarihii iyo daadadkii 2005/6. Tan waxa u sabab ah inay dib u soo kabasho weyn samaysay tirada xooluhu, gaar ahaan adhiga iyo geelgu, inay hore u martay helitaanka caanaha iyo hilibku, qiimaha xoolaha oo sarreeya, soosaarka dalagga oo fiicnaaday, iswaydaarsiga ganacsiga oo wanaagsanaaday iyo helitaanka shaqada ee dhulka webiyada oo ay ku jirto kalluumaysiga dhasheegga.

Xaaladda guud ee nafaqada ee gobollada Jubbada Dhexe iyo Hoose taniyo Deyrtii 2006/7 waxay muujinaysaa inay fiicnaatay oo ay ka soo degtay xaalad ah Halis Aad ah oo ah noqotay Halis gaar ahaan hab-nololeedka dhulka webiyada, iyadoo hab-nololeedyada xoola-dhaqatada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatadu uu ka soo fiicnaadeen xaalad ah Halis noqdeenna xaalad Adag (Khariidadda 6 iyo 7). Tani waxay la xidhiidhaa saamayntii wanaagsanayd ee roobabkii Deyrtii 2006/7 iyo roobabkii Guga 2007 ay ku yeesheen horumarinta soosaarka midhaha/firrida iyo dib-u-soo-kabashada xoolaha, taasoo kordhinaysa fursad-u-helidda caanaha iyo waxbaayaha laga soo saaro caanaha. Waxa intaas dheer, fursad-u-helidda taageerada bina-aadamnimada ee gargaarka cuntada iyo adeegyada caafimaadka ee dhulka webiyada oo wax ka taray kordhinta fursad-u-helidda cuntada iyo kala duwanaanshaha cuntada ee qoysaska. Xaaladda nafaqada ee gobolka Gedo waxay ku wadda inay ku jirto Halis taniyo Deyrtii 2006/7. Tani waxay la xidhiidhaa fursad-u-helidda soosaarka xoolaha ee ay ku jiraan caanaha iyo hilibka oo kooban kadib xoolaha oo qayb ahaan uun dib u soo kabtay goobaha qaar (hab-nololeedyada xoolaha-dhaqatada Daawa iyo beera-iyo-xoola-dhaqatada Koonfureed), roobabkii Guga 2007 oo liitay, iyo isbedellada cudurrada xilliga oo kordhay. Iminka, tirada guud ee dadka u baahan gargaar gobollada Jubbooyinka iyo Gedo waxa weeye **255,000 oo qof** oo ku jira **xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun,** taasoo ka dhigan hoos u dhac dhan 47% marka loo eego tiradii dadka ku jiray XCHAX iyo GB bishii 1aad – bishii 6aad ee 2007. Dadka qudha ee lagu tilmaamay inay ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo** waxa weeye 30,000 oo qof oo ah dadweynaha dhulka webiyada iyo beera-iyo-xoola-dhaqatada ee jooga gobolka Gedo**.**

***Gobollada Baay iyo Bakool***

Gobolka Baay, hab-nololeedyada xoola-dhaqatada iyo beera-iyo-xoola-dhaqatadu waxay muujiyeen horumar weyn marka la eego sidii ay ahaayeen Gugii 2006 iyo Deyrtii 2006/7 sababtoo ah soosaarka hadhuudhka/masaggada oo fiicnaa (98% iyo 228% Celceliska Dagaalka Kadib, siday u kala horreeyaan) iyo xaaladaha xoolaha oo hore u maray, iyadoo qaar ka mid ah adhigu ay dhalayeen illaa Guga 2007. Inkastoo gobolka Baay ay soo foodsaartay in si buuxda soosaarka hadhuudhka loogu fashilmay xilligan Guga (wuxuu ahaa 8% keliya CDK), haddana badi qoysasku weli waxay haystaan kayd midho ah oo ay isticmaalayaan iyo ku ay iibinayaan dhowrka bilood ee soo socda. Xoola-dhaqatada Koonfurta-bari ee gobolka Baay waxay ku wadaan inay ka faa'iidaysanayaan tirada xoolaha ee kordhaysa, inkastoo aanay si buuxda dib ugu soo kabanin lo'du tiradii ay ahayd abaartii ka hor. Laakiin gobolka Bakool midhaha oo aan lagu guulaysan xilligan (wuxuu ahaa 5% CDK), oo ay wehliso dhowr xilli oo hore oo soosaarku uu hooseeyey goobaha qaar, xaaladaha seeraha iyo xoolaha oo hoos u dhacaya ayaa keenaya inay sii xumaanayso xaaladda hubinta cuntada iyo hab-nololeedka ee qoysaska beera-iyo-xoola-dhaqatada ah ee saboolka ah.

Xaaladda guud ee nafaqada ee badi qaybaha Baay iyo Bakool weli waxa weeye halis taasoo muujinaysa inay ku waddo xaaladdii la diiwaangeliyey Deyrtii 2006/7 goobaha qaarna way ka sii daraysaa. Xaaladda nafaqada ee Halista ah ee ka jirta dhammaan gobolkaasi waxa loo aaneeyey inay keeneen

dillaaca cudurka Shuban Biyoodka iyo cudurro kale oo xilliga la socda, qaababka daryeelka carruurta oo liita, biyaha iyo faya-dhowrka oo liita, iyo adeegyada caafimaadka iyo nafdaqada ee goobaha qaar oo kooban. Gobolka Bakool, waxa lagu qiyaasay in **80,000** oo qof ay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** (70,000 beera-iyo-xoola-dhaqato ah iyo 10,000 oo xoola-dhaqato ah) intii u dhaxaysay bishii 7aad iyo bishii 12aad ee 2007. Gobolka Baay, horumarka dhacay wuxuu ka muuqdaa inay hoos u dhacday tirada dadka Lo'dhaqatada Koonfur-Bari ee ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** oo noqotay 5,000.

## DHEXE

### *Hliraan*

Gobolka Hiiraan, xaaladda bina-aadamnimada ee hab-nololeedyada beera-iyo-xoola-dhaqatada, iyo dhulka webiyadu waxay ku wadday inay ka sii daraysay taniyo bishii 1aad ee 2007. Beera-iyo-xoola-dhaqatada, oo hore loogu tilmaamay inay ku jireen xaalad ah **Hubin La'aan Cuntada ah oo Joogto ah** Deyrtii 2006/7 iminka waxay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)**, iyadoo 50% dadka saboolka ah (25,000 oo qof) ay saamoobeen. Hoos u dhacan waxa keenay in si buuxda loogu fashilmay soosaarka midhaha roobka ku baxa ee Guga 2007 iyo inay hoos u dhacayso awoodda wax iibsigu qiimaha dalagga ee kordhaya dartiis. Xaaladda dhulka webiyada ee gobolka Hiiraan si weyn ayay uga sii dartay taniyo Deyrtii 2006/7. Inkasta oo qoondaynta xaaladdu ay tahay sideedii hore ee ahayd **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)**, haddana waxa jirta in tirada dadka saamoobay ay sii korodhay xilligan. Dadka ku jira **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)** wax iminka ku jira 100% dadka saboolka ah iyo 25% kooxda hantidoodu ay dhaxayso ee dadweynaha dhulka webiyada, taasoo saamaysay 15,000 oo qof. 5,000 oo qof ayaa iminka ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)**, taasoo ka dhigan 25% kooxda hantidoodu ay dhaxayso ee dadweynaha dhulka webiyada.

Xaaladdan sii xumaatay waxa keenay saamaynta arrimaha isbiirsaday ee ay ka midka yihiin shan sano oo soosaarka midhaha/firridu uu liitay ama lagu fashilmay abaaro iyo daadad dartood. Heerarka soosaarka ee shantii xilli ee u dambeeyey marka loo eego celceliska dagaalkii kadib (CDK ee 1995-2006) waxa weeye 3% CDK ee Gugii 2005, 17% CDK ee Deyrtii 2005/6, 33% CDK ee Guga 2006, 81% CDK ee Deyrtii 2006/7 iyo 46% ee CDK ee Guga 2007. Qiimaha gallaydu wuxuu kordhay 47% laga billaabo bishii 1aad illaa bishii 7aad ee 2007 (isagoo ka kordhay 2,900 ShSo/kg noqdayna 4,250 ShSo/kg), inkastoo qiimaha hadhuud-hka/masaggadu uu kordhay 15% bishii 1aad illaa bishii 7aad ee 2007 (isagoo ka kacay 2,600 ShSo/ kg noqdayna 3,000 ShSo/kg). Awoodda wax iibsiga ee saboolka, sida lagu qiyaasayo Iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya shaqada oo lagu beddellanyo dalag, waxay hoos u dhacday 17% bishii 7aad ee 2007 marka loo eego bishii 1aad ee 2007, fursadaha shaqaduna way koobanyihiin. Sidoo kale, awoodda wax iibsiga ee beera-iyo-xoola-dhaqatada (Iswaydaarsiga ganacsiga ee dalag lagu beddelanyo ri) wuxuu hoos u dhacay 12%, laakiin weli wuu u fiicanyahay kooxaha ladan (kuwa dhaqaalahoodu dhexeeyo iyo kuwa hantida leh). Xaaladda nafaqadu waxay ku waddaa inay tahay Halis (15-19.9%) dadweynaha gobolka Hiiraan marka laga reebo magaalada Beled weyne oo ay tahay mid Adag (10-14.9%). Waxa la arkay in xaaladda dadka beera-iyo-xaala-dhaqatada ee degmooyinka Jalalaqsi iyo Buula Burti ay ka sii xumaatay xaalad Adag oo ay ku jireen Derytii 2006/7 oo ay noqotay hadda Halis.

### *Gobollada Dhexe*

Degmooyinka Cadaado, Dhuusamareeb iyo Ceel-Buur badi berkadaha iyo biyo-galeennadu horeba way u qallaleen biya-dhaamis ayaana billaabay laba bilood ka hor sida caadiga ah, taasoo ay la xidhiidhaan qiimaha oo kordhay roobabkii Guga 2007 oo caadi ka hooseeyey (20-40% celceliska muddada dheer) dar-tood. Daaquna wuu sii xumaaday goobaha qaar. Saadka seeraha ee hoos u dhacay wuxuu sii kordhinayaa halista ka imanaysa colaad khayraadka dabiiciga ah ku salaysan, oo horeba uga billaabmay goobaha qaar bishii 8aad. Hase yeeshee, horeba xaaladaha jidhka xooluhu way wanaagsanyihiin ama waa caadi saamaynta wanaagsan ee ka timi roobabkii Gugii 2006 iyo Deyrtii 2006/7. Xaaladaha jidhka xooluhu waxa la filayaa inay billowdo inay ka sii darto inta lagu jiro xilliga Xagaaga ee qalallan.

Dhalmada xooluhu way sarraysaa adhiga heerarka rimidda oo sarreeyey Deyrtii 2006/7, hase yeeshee, dhalmada geelu way hoosaysay heerarka rimidda oo liitay Gugii 2006 dartood. Heerarka dhalmada geela oo aad u sarreeya ayaa la filaya Deyrta 2007/8. Tirada xooluhu dib ayay u soo kabatay oo way korodhay dhammaan gobollada Dhexe, iyadoo kor u kacday 5-10% tirada geelo, iyo 10% tirada adhiga taniyo xilligii Deyrtii hore. Qiimaha xooluhu in yar ayuu kordhay, laakiin iswaydaarsiga ganacsiga (IG) ee ri/dalag hoos ayuu u dhacay qiimaha bariiska ee aadka u kordhay dartiis. Qiimaha bariiska, sonkorta iyo baatrooku wuxuu kordhay 45%, 14% iyo 30%, siday u kala horreeyaan xilligan, qiima-jabka shilinka Soomaaliya marka loo eego Doolarka Maraykanka dartiis. Suuqa Gaalkacayo, iswaydaarsiga ganacsiga (IG) ee rida dibaaxa/dhaqashada ah oo lagu beddelanyo bariis wuxuu hooseeyey 38% bishii 7aad ee 2007 (38.47kg/neefkii) marka loo eego bishii 7aad ee 2006 (62.23 kg/neef ). Sidoo kale, suuqa Dhuusamareeb, Iswaydaarsiga Ganagsiga ee rida dibaaxa/dhaqashada oo lagu beddelanyo bariis wuxuu hoos u dhacay 35%, suuqa Caabud-waaqna wuxuu hoos u dhacay 15% isla muddadaas (bishii 7aad ee 2007 marka loo eego bishii 7aad ee 2006). Inkasta oo qiimaha bariisku uu kordhay, iswaydaarsiga ganacsigu uu hooseeyey, kharshka sare ee la xidhiidha biya dhaamiiska xilligiisii ka soo horreeyeyna uu jiro, haddana qoysaska xoola-dhaqatada iyo beera-iyo-xoola-dhaqataduba waxay fursad u haystaan cunto ku filan tirada xoolaha ee dib u soo kabtay oo kordhay sannadkii la soo dhaafay dartood (bishii 4aad ee 2006 April 2006-bishii 3aad ee 2007). Falanqaynta kharashku waxay muujinaysaa in qoysasku ay haystaan xoolo ku filan oo ay iibiyaan si ay ugu isticmaalaan kharashka qiimaha kordhay ee cuntada, iyo weliba kharasha biya-dhaamiska dhowrka bilood ee socda.

Waxa la arkay in soosaarka midhaha lagu fashilmay dhulka digirta laga beero ee degmooyinka Xarardheere, Ceelbuur iyo Ceeldheer, iyadoo uu ku dhacay qoyaan la'aan ka yimi roobabka Guga 2007 oo caadi ka hooseeyey dartood. Iminka ma jiro kayd ku saabsan soosaarka dalagga guduhu. Hase yeeshee, xaaladda nafaqadu guud ahaan waxay muujinaysaa isbeddello horumar ah hab-nololeedyada Adduun iyo Hawd, iyadoo dhulka digirta laga beero ee Xeebta Deex ay muujinayso inay jiraan isbeddello ah in nafaq-darradu ay korodhay. Hase yeeshee waxa jira walaaca ka imanaya saamaynta cudurka Shuban Biyoodka, barakaca kordhay iyo xiisadaha nabad la'aanta ee saamaynaya fursad-u-helidda biyaha, daaqa iyo suuqyada. Heerka digniinta hore ee **Indo-ku-haynta** ee jiray Deyrtii 2006/7 waxay isu beddeshay **Halis Dhexdhexaad ah** ee dhammaan gobollada dhexe bisha 7aad illaa bisha 12aad ee 2007. Tilmaamey-aasha ay tahay in la kormeero xilligani waxa weeye qiimaha cuntada (ta lagama maarmaanka ah/ta aan ahaynba) iyo iswaydaarisga ganacsiga ee la xidhiidha qiimaha biya-dhaamiska, saamaynta ay dadka barakacay ku leeyihiin bulshooyinka dhulka miyiga ah ee ay martida u yihiin, iyo halista sii kordhay ee colaadda ku salaysan khayraadka dabiiciga ah (ee ku saabsan fursad-u-helidda biyaha iyo daaqa).

## GOBOLLADA WAQOOYIGA

Dhammaan goobaha xoola-dhaqatada iyo beera-iyo-xoola-dhaqatada ee gobollada waqooyiga waxay ku jiraan xaaladda caadiga u ah ee **Hubin La'aan Cuntada ah oo Joogto ah (HCJ).** Hase ysshee, xoola-dhaqatada Adduun iyo Xeebta Deex ee degmooyinka Eyl, Jarriban iyo Gaalkacayo waxa lagu tilmaay inay ku jireen heerar digniin hore oo ah **Halis Dhexdhexaad ah** xaaladdoodu way ka sii dartay sababtoo ah saamaynta arrimaha isbiirsaday ee roobabkii Guga 2007 ee hooseeyey (Roobabka Guga 2007 waxay ahaayeen 20-60% celceliska muddada dheer), xaaladaha seeraha oo liita (biyaha iyo daaqa),

Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

iyo iswaydaarsiga ganacsiga oo hoos u dhacaya (xoolo lagu beddelanyo bariis). Badi berkadaha iyo ceelasha hab-nololeedyada xoola-dhaqatada ee Adduun iyo Xeebta Deex way qalalan yihiin, xaaladaha daaquna way ka sii dareen oo way liitaan. Qoysaska kooxaha hantidoodu ay tahay dhexdhexaad sare oo keliya ayaa awoodi kara kharashka kore ee biyo iibsiga iyo kharashka gaadiidka ee sare si ay ugu guuraan degmooyinka Goldogob iyo Burtiinle. Qoysaska koox hantiyeedka saboolka ah iyo kuwa dhexe ma awoodaan inay guuraan, sidaas darteeday waxa ay soo food saaraysa xaalad sii xumaanaysa. Inkastoo xaaladda nafaqada ee badi dadweynaha dhulka miyiga ah ee gobollada waqooyigu aanay iska beddelin xaaladdii ay ku jireen Deyrtii 2006/7 ee ahayd Feejignaan, haddana waxa lagu arkay hab-nololeedyada Xeebta Deex in heerarka nafaq-darradu ay kordheen. Qiimayn nafaqada ah oo la sameeyey bishii 5aad ee 2007 waxay muujinaysaa heerar Nafaqada Adduunka ah oo xun oo ah 14.9%, (Adag) taasoo ka xun marka loo eego natiijda ka soo baxday Xeebta Deex oo ah **<10%.** Qiimayn degdeg ah oo laga sameeyey Adduun oo la cabiray cududda intii lagu jiray Guga 2007 waxay iyana muujisay in xaaladdu ay ka sii xumaatay Feejignaan oo ay noqotay mid Adag**.**

Xaaladaha jidhka xoolaha ee dhammaan noocyada xooluhu way wanaagsantahay ama waa caadi waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed. Soosaarka caanaha riyahu markii u horraysay ayuu heerkiisu caadi ahaa. Helitaanka caanaha geelu iminka wuu hooseeyaa, laakiin waxa la filyaa inuu fiincaando marka ay geelu billaabaan inay dhalaan Deyrta soo socota ee 2007/8. Tirada geela iyo adhigu si buuxda ayay dib ugu soo kabatay heerarkooduna aad ayuu u kordhay (150-200% iyo 140-180%) marka loo eego celceliska heerarka tirada xoolaha. Lama soo sheegin cudur xoolaha gala oo dillaacay, hase yeeshee cudurrada caadiga ah ee sida Sambabka, Furuqa iyo Shilinta/Qaniinka ayaa saamaynaya adjhiga iyo geela. Badi xoola-dhaqatadu waxay fursad caadi ah u haystaan xoolo ay iibin karaan ama wax ku beddeshaan marka la eego qiimaha dalagga ee dhowaan kordhay. Goobaha qaarna badi xoola-dhaqatadu dib ayay u bixiyeen deynkii ku biiray. Goobaha ay ka midka yihiin Sool, Nugaal (degmada Caynabo) iyo qaybo ka mid ah gobollada Sanaag waxay heleen roobab Guga 2007 oo liita, laakiin dhammaan koox hantiyeedku si sahlan ayay ugu guuri karaan Nugaal oo daaqa iyo biyaha si fiican looga helo. Goobaha beera-iyo-xoola-dhaqatada ee waqooyi-galbeed, abuuritaanka soosaarka midhaha/firrida ee 2007 waxa lagu qiyaasay inuu yahay 25,000 MT, taasoo ah 101% Gugii/Karantii 2006 kana sarreeya 141% CDK ee Guga/Karanta. Xilliyo isku xighay oo soosaarka Guga/Karantu uu ka sarreeyey caadi ayaa hore u mariyey hubinta cuntada kadib markii uu kordhay helitaanka iyo fursad-u-helidda dalaggu, isla markaana siiyey beera-iyo-xoola-dhaqatada qaab ay ku helaan dakhli naqad ah.

Xoolaha la dhoofiyaa hore ayay u mareen dekedda Berbera, iyadoo Dekedda Boosaaso ay aad hoos ugu dhaceen badda oo kacsan oo keenaysa in maraakiibta yaryari aanay ku soo xidhan darteed. Dekedda Berbera may saamayn kacsanaanta baddu. Heshiis dhex maray maamulka Bantlaand iyo ganacsade xoolaha ah oo Sucuudi ah way diideen ganacsatada xoolaha ee guduhu taasoo keentay inay ganacsatadu xoolahooda haystaan oo aanay iibin. Guud ahaan qiimaha xooluhu wuu fiicnaanayaa. Qiimaha riyaha dibedda loo dhoofiyo ee waqooyi-galbeed iyo waqooyi-bari bishii 7aad ee 2007 wuxuu sarreeyey 17% iyo 28% marka loo eego bishii 7aad ee 2006 iyo 43% iyo 29% marka la barbar dhigo celceliska shanta sano ee qiimaha bisha 7aad (2002-06), laakiin wuxuu hoos u dhacay 14% iyo 2% marka loo eego bishii 12aad ee 2006 (dalabka oo markaas aad u sarreeyey xilligii Xajka), siday u kala horreeyaan. Isla muddadan, qiimaha bariiska ee waqooyi-galbeed kor ayuu u kacay bishii 7aad ee 2007 oo wuxuu sarreeyey 6% marka loo eego bishii 7aad ee 2006, 17% marka la barbar dhigo celceliska qiimaha bisha 7aad (2002-06) iyo 8% marka loo eego bishii 12aad ee 2006. Waqooyi-bari, qiimaha bariisku wuxuu korreeyaa 70% marka loo eego bisha 7aad ee 2006, 59% marka loo eego celceliska shanta sano ee qiimaha bisha 7aad (2002-06) iyo 53% marka la barbar dhigo bisha 12aad ee 2006. Qiimaha bariiska ee kordhay waqooyi-bari waxa u sabab ah qiima jabka Shilinka Soomaaliya ee ay keentay tirada saadka lacagta ee korodhay kadib markii lacag cusub oo Shilinka Soomaaliga ah oo warqad ah oo la daabacay la soo geliyey suuqyada.

Sayladda xoolaha lagu qalo ee Burco waxay dib u billowday inay hilibka u dhoofiso Gacanka Carabta bishii 3aad ee 2007, kadib markii howlaha sayladdaas la joojiyey markii si aan rasmi ahayn loo mamnuucay dhoofinta xoolaha bishii 1aad ee 2007 taasoo la hirgeliyey markii la xaqiijiyey in cudurka Dooxada Rift uu ka jiray waqooyiga-bari ee Kiiniya. Bishii 1aad illaa bishii 7aad ee 2007 30,540 neef hilibkoodii ayaa laga dhoofiyey salaydda hilibka lagu qalo ee Burco, taasoo 18% hoos u dhacday marka la barbar dhigo isla xilligan sannadkii la soo dhaafay (37,094 neef hiliboodii). Xaaladda nafaqada ee dadka barakacay ee jooga Gaalkacayo waa Halis halkaas oo qiimayn nafqada ah oo laga sameeyey bishii 5aad ee 2007 ay muujisay heer nafaqa-darrada Adduunka ah (GAM) oo aad u xun oo ah 21.9%, taasoo aad uga sarraysa heerarkii hore ee ka yaraa 10% waxana laga yaabaa inay xidhiidh la leedahay heerarka cudurrada iyo fursad-u-helidda adeegyada caafimaadka ee yaraatay.

**Warbixinaha dhowaan soo baxay iyo kuwa soo bixi doona**

*War Saxaafadeedka FSAU, 13kii Bisha 8aad, 2007*
*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET, Bisha 8aad, 2007*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET, Bisha 8aad, 2007*
*Warbixinta Bishii ee Nafaqada ee FSAU, Bisha 7aad, 2007*
*Taxanaha Farsamada ee Falanqaynta Deyrta 2006/7 Kadib ee FSAU, Bisha 2aad, 2007*
*Taxanaha Farsamada ee Falanqaynta Guga 2007 Kadib ee FSAU, Bisha 9aad, 2007 (Wuu soo socdaa)*

***XUSID:*** *Daabacaadaha iyo warsaxaafeedyada kor ku xusan waxa laga helayaa Websaytka FSAU: www.fsausomali.org*

Technical & Managerial Support
European Commision
USAID
Sida
FEWS NET
United Nations World Food Programme
care
unicef
OCHA
Save the Children UK
Funding Agencies
Technical Partners